# SOOMAALIYADA BILICSAN



# SOOMAALIYADA BILICSAN

**Waxa soo saaray** :

Wasaaradda Warfaafinta & Hanuuninta Dadweynaha



**Jaalle Dr. Cabdi qaasim Salaad Xasan Wasiirka Was. Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha**

# TUSMO


Taariikh . . . . . . . . . . . . . . 1

Juqraafi . . . . . . . . . . . . . . 7

Kacaan . . . . . . . . . . . . . . 10

Dalxiiska . . . . . . . . . . . . . . 11

Hiddaha iyo Dhaqanka . . . . . . . . . 19

Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda 22

Waxbarashada . . . . . . . . . . . . 32

Caafimaadka Dadka . . . . . . . . . . 36

Warshadeynta . . . . . . . . . . . . 38

Muuska . . . . . . . . . . . . . . 44

Caddaaladda iyo Sharciga . . . . . . . . 48

Ganacsiga . . . . . . . . . . . . . 57

Xoolaha . . . . . . . . . . . . . . 59

Cudurrada xoolaha . . . . . . . . . . 62

Macdanta dalka . . . . . . . . . . . . 64

Beeraha . . . . . . . . . . . . . . 68

# GOGOLDHIG

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, oo magacyo badan dibedda looga yaqaan, sida Arliga Bunt, Geeska Afrika, Soomaaliya, iwm, waxay ku jirtey suryo mugdi ah muddadii ka horraysay Kacaanka, waxbana lagama qorin taariikhda, kheyraadka iyo degaanka dabiiciga ah ee dalka.

Taas waxa sabab u ahaa iyadoo ay gumeystayaashii rabeen inay Soomaaliya ka qarsoonaato dunida kale, haddiibase wax laga sheegana (si kastaba ha ahaatee) waxay ahaan jirtey wax silloon oo maroor ah.

Taasi waxay keentay in Soomaaliya lagu tilmaamo dal sabool ah oo qarax ah, taasina waxyeello avey u geysatey dalka, waxaanay saamaysey dhaqaalaha qaybihiisa badan.

Siyaasiyiintii dibusocodka iyo musuqmaasuqa ahaa ee dhaxlay gumeystayaashii, markii gobannimada la hantiyey, waxba kamay qaban sidii loo tirtiri lahaa beentii qaawanayd ee Soomaaliya laga faafiyey. Waxay mashquul ku noqdeen dano gaar ahaaneed.

Maahmaah Soomaaliyeed baa waxay tidhaahdaa : «Been fakatay runi ma gaadho», hase yeeshee taasi ma rumoobin, waayo Dawladda Kacaanka ah ayaa runtii qaawisay dacaayaddii beenta ahayd ee ay imberyaaliyaddu ka faafisay Ummadda Soomaaliyeed.

Maantana Soomaali way taqaan saaxiibkeed iyo cadowgeedba, cidina ma qarin karto isbeddelka horumarineed ee uu dalku ku sameeyey muddada yar ee uu ku hayaamay siyaasadda ku qotonta Hantiwadaagga Cilmiyeed.

Horumarka taabbagalka ah ee ay Soomaalida Kacaanka ah ka soo hoysay xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhaqankaba waxa si aad ah u ogsoon taariikhda, iyadoo bartilmaameeddeenna horumarineed ay maalinba maalinta ka dambeysa ka soo dhowaanayaan. Taasna waxa suura geliyey korniinka garaadka siyaasadeed ee dadweynaha, himilada dhiirrigelinta ah ee guulaheenna iyo dadka oo si buuxda u oggol falsafadda Kacaanka oo uu Xisbigu si wacan u daadi-

Halkan kuma soo koobi karno guulaha iyo himilooyin-

hinayo.

ka dalka, hase yeeshee qofku indhihiisa ayuu qabaa, markuu akhristo buuggan kooban ee lagu magacaabo «SOOMAALIDA BILICSAN».

# TAARIIKH

Taariikh fog oo meel mar ah ayaa ka danbaysa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya ee maanta. Faraaciinadii Masar waxay Soomaaliya u yaqiineen «ARLIGII BUNT», iyagoo ka guran jiray fooxa iyo cuudka lagu isticmaali jiray xabaalihii (temples) Faraaciinadii qarnigii 15aad (B. C.).

Faraaciinadu horey u yiqiineen gobolka, iyagoo badmareenkoodu ku magacaabeen (Gobolkii Khumkhumka). Dhanka kale Roomanku waxay ku tilmaami jireen «Arligii dahsoonaa» (Terra incognito).

Carabta iyo Faarisiyuuntu xiiso weyn ayey u hayeen carrada Soomaaliyeed, tan iyo qarnigii tobnaad, kaddibna doolaalayaal badan oo iyaga ka tirsanaa ayaa u tegay Soomaaliya ganacsato ahaan, iyagoo caqiidada Islaamka ku fidin jiray dalka. Waxay barteen habkii nololeed ee magaalooyinka, sida Muqdisho, Warshiikh, Marka iyo Baraawe oo ku yaalla geeska Koonfureed, iyo Saylac, Berbera, Bandar Cabbaas oo ku yaalla qaybta Waqooyi.

Waxa jira raadad badan oo caddeynaya in arliga Soomaaliyeed, gaar ahaan marsooyinka Xeebaha, uu xiriir hore la lahaa Bariga fog, sida Shiinaha, Beershiya iyo Caraabiya. Qarniyadii 15aad iyo 16aad, boqortooyo xoog leh oo Muslim ah ayaa ka hana qaadday Muqdisho iyo Waqooyiga bari ee geeska. Boqortooyadii xeebeed ee «AWDAL», xarunteeduna ahayd Saylac waxay dalka Soomaaliya ka daafacdey weeraradii Boortaqiiska iyo Boqorradii Itoobiya ee kala duwanaa. Soomaalidu kaalin weyn ayey ka ciyaareen Boqortooyinkaas, si geesinnimo ahna waxay uga qayb galeen jihaadkaasi.

Muddadii lagu jiray jihaadkaasi geesiyaashii ugu caansanaa waxaa ka mid ahaa geesigii Soomaaliyeed, AXMED BINO IBRAAHIM, oo loo yiqiin Axmed Gurey, oo ciidankiisii ay si isku dubbaridan ugu jilib dhigeen is-huwantii cii-

dammadii Itoobiya iyo Boortuqaal muddadii u dhaxaysay 1528 - 1542kii.

Kaddibna waxay gacanta ku dhigeen meela badan oo ka mid ah buuraleyda Itoobiya, isla markaana waxay ciidammadii Axmed Gurey dileen Baqorkii Itoobiya. Axmaaradu waxay kale oo markaa u qayshadeen kaalmo Millatari oo Boortaqiis, 1542kiina waxa la dilay Axmed Gurey, isagoo goob dagaal ku jira.

Bilawgii qarnigii 18aad, Xeebta Koonfureed ee dalka waxa qabsaday nin la oran jiray Saalim Al-Samiini, isagoo ka wakiil ahaa Suldaankii Cummaan, wuxuuna Talyaaniga ka iibshay xeebaha Koonfurta Soomaaliya ee uu xukumi jiray sannadkii 1889kii.

Dabayaaqadii 1889kii, ayey xukuumaddii Talyaaniga ogeysiisey xoogaggii Yurub inay mustacmarad ka samaysatay qayb ka mid ah gobollada xeebaha Koonfureed. Isla xilligaasi Talyaanigu waxay cuqaashii Soomaaliyeed kula gorgortamayeen meelayowga xeebeed ee Waqooyiga Muqdisho, iyo dhulka laga bilaabo Muqdisho ilaa Raas Gardafuu oo ku taalla fiiqa Geeska.

Talyaanigu wuxuu xukumi jiray qaybtaa ka mida dhulka Soomaaliyeed tan iyo markii ay qabsadeen ciidammadii Ingiriisku iyo Koonfur Afrika, dagaalkii labaad ee adduunka (1939kii ilaa 1945kii), iyadoo 1941kii maamul Millatari oo Ingiriis laga dhisay arligii loo yiqiin «Soomaalidii Talyaani». Hase yeeshee dhawr sano ka dib, waxaa aloosmay culays siyaasadeed oo dadkii Soomaaliyeed ee arligaasi degganaa ay ku dalbeen xornimo iyo is-maamul.

Sannadkii 1948kii, ergo afar ah oo ka socotay Ummadaha Midoobey, kana koobneyd Mareykan, Midawga Soofiyeeti, Ingiriis iyo Faransiis ayaa Niyuu Yoork laga soo diray si ay u tagaan Soomaaliya, isla markaasna ay soo hubiyaan



waxay doonayaan dadka halkaas deggani. Ingiriiska oo dalka Talyaaniga ka qabsaday, wuxuu filayey inay Soomaalidu u magacawdo inuu weligii sii addoonsado dalka hase yeeshee siyaasiyiintii Soomaaliyeed, oo ogsoonaa inay taasi liddi ku tahay danahooda waddaniga ah; waxay ergadii u sheegeen inay himiladoodu tahay inay ka madax bannaanaadaan hab waloo xukun gumaysi.

21kii Noofembar 1949kii, ayuu shirka Guud ee Ummadaha Midoobey isku raacay in muddo toban sano ah uu dalku hoos harsado Ummadaha Midoobay, iyadoo Talyaaniga loo magacaabay maamulka Dalka, iyadoo xukuumaddiisu ay hoos imanayso gole la tashi oo raacsan Ummadaha Midoobey, kana koobnaa Filibbiin, Masar iyo Koloombiya, si ay Soomaaliya ku gaarto dawlad Afrikaan ah oo madax bannaan, muddadaas loo qariray ee tobanka sano ah.

1dii Abriil 1950kii, Talyaanigu wuxuu la wareegay maamulkii dalka, iyadoo 1dii Luuliyo 1960kii, ay xorowday Soomaaliyadii hoos joogtay Ummadaha Midoobey.

Arliga Waqooyi ee horey loo oran jiray «Soomaalidii Ingiriiska» wuxuu mustacmarad Ingiriis noqdey sannaddii 1881kii iyo 1886kii, kaddib markii Ingiriisku macaahidooyin la saxeexday cuqaal iyo Sheekhyo Soomaaliyeed.

Bilawgii iyo intii ka danbaysay 1827kii, Ingiriisku mucaahido saaxiibtinimo ayuu ku lahaa xeebtaas.

Inkastoo Soomaali Laand iyo dadkeedu ay u gacan galeen gumaysi Ingiriis, mucaahadooyinkaas kaddib Ingiriisku wuxuu daba marteeyey danihii Soomaaliyeed, isagoo mucaahado kale la galay Itoobiya 1897kii, halkaasoo uu qayb weyn oo ka mid ah dalka Soomaaliyeed, loona yaqaanno «HAWD doon innaba lala tashan lana ogeysiin dadka Soomaaliyeed. IYO MEELAHA SEERAN» uu ku wareejiyey Itoobiya, iya-

Tabaabushooyinkaasi waxa si sir ah isu weydaarsaday

Boqor Menelikii Itoobiya iyo Loodh Rod oo ahaa Ingiriis oo isagoon war iyo wacaal ka hayn dalkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku gumeysan jirey, qabqable ka ahaa guddigii Ingiriiska ee soohdinta, si ay ula soo gorgortamaan Itoobiya iya goo ka wakiil ah dawladdii Ingiriiska.

1889kii, amase laba sano ka dib markii ay dhacdey guuldarradaas, hoggaanshihii waddaniga ahaa ee Soomaaliyeed, SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN, oy nacabkiisa Ingiriis ku tilmaami jireen (WADAADKII WAALLAA EE SOOMAALIYEED), ayaa abuuray dhaqdhaqaaq waddani ah oo xoog leh oo loo yiqiin «DARAAWIISH», kuwaasoo uu ka abuuray bariga dalka, waxaanu ku dhawaaqay inuu diiddan yahay gumaysi ka taagan dalkiisa, isla markaasna wuxuu guddoonsaday halgan hubaysan.

In ka badan labaatan sano ayuu dagaal kulul ugu jiray sidii uu dalkiisa uga dul qaadi lahaa heeryada gumaysiga.

Ingiriiska, oo garwaaqsaday in Sayid Maxamed ahaa bir lab aan la loodin karin, ciidammo ayuu ka soo urursaday Hindiya, Nayaasland, Kiinya iyo Suudaan si ay ula dagaallamaan dhaqdhaqaaqaa waddaniga ahaa. Weliba ciidammada Itoobiya iyo Kiiniya waxay gacan ka geysteen si looga hor tago inuusan dhaqdhaqaaqaasi ku fidin dhulalka kalee Soomaaliya ee ay hore u boobeen.

Aad ayey u hoobteen dhammaan dhinacyadii kala duwanaa 20kaa sano ee dagaalku socdey. Inkastoo Sayid Maxamed lagu jabiyey weerarro xagga cirka ah, haddana umay suuroobin nacabkiisii iney gacanta la helaan.

Sayid Maxamed Cabdalla Xasan bes ama tii Alla ayuu u dhintay, waxaana lagu aasay Iimay oo ku taalla dhulka Soo maaliyeed ee ay Itoobiya hadda haysato.


Xoogaggii gumaysiga marna umay suuroobin inay qabrigiisii helaan inkastoo ay baafis lixaad leh ku qaadeen kuna asqoobeen.



Dhimashadii Sayid Maxamed Cabdalla Xasan oo dadka Soomaaliyeed oo idili u aqoonsan yihiin inuu ahaa geesi weyn oo waddani ah, halyeeyo badan ayaa ka daba dhashay, sidaa daraadeedna nidaamkii gumaysi ee Ingiriisku marnaba ma xasilin, sababtuna waxay ahayd dadka Soomaaliyeed oo ka soo horjeedey.

Taa waxaa xigay halgan siyaasadeed oo dadku ka oogeen dalkoo idil, taasina waxay dhalisay inuu Ingiriisku shadaaftiisa ka duuduubto geesta waqooyi gobannimo sandulle ahna wuxuu bixiyey 26kii Juun 1960kii, shan beri kaddib oo ay ahayd 1dii Juulayna waxay ku biirtay Soomaalidii Talyaaniga, halkaasoo ay abuurantay Jamhuuriyadda Soomaaliya.

1dii Juulay 1960kii ilaa 20kii Oktoobar 1969kii, waxa dalka u talin jiray talisyo macmil ah oo fuliya danaha gumaysiga cusub, kuwaasoo oodda loo rogay 21kii Okt. 1969kii, kaddib markii ciidammada qalabka sida oo ka tarjumaya himilada dadweynaha Soomaaliyeed, la wareegeen xilkii waddanka, tan iyo maalintaasna waxa abuurmay bulsho caafimaad qabta.



# JUQRAAFI

Geeska Afrika waa gobol Juqraafiyeed oo ku taxan badh tamaha bariga Xeebta Afrika oo gabi ahaantiis ay dadka Soomaaliyeed deggan yihiin.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya qayb weyn ayey kaga fadhidaa Geeskaasi. Jamhuuriyaddu waxay taxan tahay xagga bari marka laga soo bilaabo Baabel Mandab, amase marinka Koonfureed ee badda Cas, tan iyo qoorriga Cadmeed ilaa Raas Gardafuu, xagga Koonfureed Badweynta Hindiya ilaa Raas Kambooni. Dalku wuxuu leeyahay xeeb dhererkeedu yahay 2.000 mayl (3200 Km.), amase xeebta ugu dheer Afrikada xorta ah.

Jamhuuriyadda waxaa galbeed ka xiga Xabashida, Kiiniya oo ka xigta Koonfur-Galbeed iyo Xeebta Soomaaliyeed oo kaga qabsan Waqooyi-Galbeed. Soohdinta ay la leedahay Xabashida waa xarriiq ku meel-gaar ah oo uu jeexay maamulkii Militariga Ingiriisku sannadkii 1948-kii. Jamhuuriyadda oo ka kooban 262,000 oo Mayl oo wareegsan amase 636.541 Km., oo wareegsani waxay le'eg tahay Faransa iyo Talyaaniga oo laysku daray, Jili amase Tagsasta Maraykan.

Dalka waxa fiqda Koonfureed ka mara xarriiqda dhulka badha, taasoo lool ahaan taxan $1^0$ 39 xagga Koonfurta ilaa $12^0$ dhinaca waqooyi. Fad ayaa laga dhisay jidka u dhexeeya Jilib iyo Kismaayo ee Gobolka Jubbada Hoose, si loo calaanceeyo xarriiqaasi dhulka kala badha, waxaana ku qoran erayadan Laatiinka ah (EQUINOCTIALA CIRCULUS).

Qaybta badan ee dalka waxa ku yaalla taag ka soo baxa Badweynta Hindiya. Dhinaca Woqooyi waxa daadsan buuraha Golis ee 5ta kun ee fuudh ah oo garab gala qoorriga Cadmeed. Buurahaasi waa taxanaha bari ee buuraleyda Harar. Dhinaca Koonfureed ee dalka waxa mara Wabiyada Jubba iyo Shabeelle, labadaas webi oo ka soo unkama koonfurta buuraleyda Harar, una dhaw dooxada Rift (Rift Valley).

Raas Kamboomi oo Koonfur ka xigta Kismaayo, waxa u dhow Jasiiradda qurxoon oo loo yaqaanno «Baajuuni» waxaana kaloo jira Jasaa'irka Maydh ee Gobolka Sanaag iyo Jasiiradaha Sacaadu Diin iyo Cibaad oo u dhow magaalada Saylac. Raas Gardafuu qudhiisa waxa soo eegaysa Jasiiradda «Soqodara», taasoo ay ku dhammaadaan silsilado Jasiirado iyo turunbuco ahi. 150 Mayl oo qudha ayey u jirtaa Xeebta Soomaaliyeed, hase yeeshee eeggan waa qayb ka mid ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee dadka Yaman.

Juquraafi ahaan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay u qaybsan tahay Gobollada soo socda:

**I*. Bannaanada Xeebeed.**

Taasi waa arliga hoose ee dalka, waxaanay taxan tahay qoorriga Cadmeed iyo Badweynta Hindiyaba. Bannaan xeebeedka Waqooyi waa kulayl qallalan, waxaana loo yaqaan «GUBAN». Ballaadhka Bannaanku wuxuu soo ururaa markuu joogo qiyaas ahaan 80 Mayl oo galbeed ka jirta Saylac. Wuxuu ka soo kacaa badda ilaa cidhifyada buuraha ..... Golis, qiyaas ahaan 3000 oo fuudh. Waxaa jira silsilado buureed oo ah nuurad iyo ciid, kuwaasoo garab socda xeebta. Arligaasi waa midka ay jiifto macdanta loo yaqaan GYPSUM. Fiiqaqa qaarkood sida Almis (2000 oo fuudh) oo galbeed ka xigta marsada gabowday ee Bullaxaar, ayaa weliba jira. Ciiddu badanaa waa cagaag, bacaad iyo cmos. Cidhifyada silsiladda Golis, waxa safan ilo biyo kulul. Laag yar oo ka soo jabta Dooxada weyn (Rift Valley), ayaa taxan marka laga bilaabo Dooxada Hawaas ilaa Karin oo u dhaw Raaska Khansiira oo ku taalla bariga Berbera.

Dhanka Badweynta Hindiya, bannaan xeebeedku wuxuu ka soo ururaa qiyaas 100 mayl dhinaca Koonfurta ka hoosaysa Muqdisho ilaa 10 mayl dhinaca Raas Gardafuu. Bannaan xeebeedka Koonfurta waa kulayl sannadkoo idil.

**II*. Silsiladda Golis.**

Silsiladdaasi buureed waxa loo yaqaan Golis amase oogo oo meenaheedu yahay (Dhul sare). Waa taxa bari ee buuraleyda Harar, waxayna garab galaan qoorriga Cadmeed ilaa Raas Gardafuu, halkaasoo ay ku dhammaadaan. Silsiladdu waxay kasoo kacdaa Guban, waxayna tartiib-tartiib ugu aroortaa taagga Hawd iyo Dooxada Nugaaleed.

Silsiladdaasi waxa ka farcama togag iyo dooxyo ku fida dhanka Koonfur Woqooyi. Waxaa jira dhawr marin sida wareeg iyo Boosaaso-karin ee silsiladda u qaybsha fiiqaq buureed oo kala duwan, oo meelaha qaarkood dhererkoodu gaadho inta u dhaxaysa 6.000 iyo 8.000 oo fuudh.

**III*. Taagga Hawd.**

Taagga Hawd waa arli ballaaran oo oomane ah, wuxuu ka mid yahay taagga weyn ee Soomaaliya ee waliba taxan dhulka Jubba iyo Mudug. Dhinaca koonfureed ee Golis ayuu ka soo foorarsadaa iyo weliba qaybta koonfur bari ee buuraleyda Harar.

**IV*. Dooxada Nugaaleed:**

Waa dhul hoose gaarana 1.000 ilaa 2.000 oo fuudh oo leh buuro yar oo ku siman 3.000, oo fuudh sida ta Buur Caanood ee u dhaw Xuddun. Waxay ku beegan tahay bariga taagga HAWD, xagga Woqooyina qaybta Woqooyi ee Mudug. Waxay dabooshaa qaybta weyn ee Nugaal. Dooxada waxaa mara togagga Dharroor iyo Nugaal. Waxaa kaloo jira Dooxyo iyo harooyin madhan.

**V*. Mudug:**

Waa Gobol Juquraafiyeed yar oo ku yaalla koonfurta Nugaal. Woqooyiga Webiga Shabeelle iyo galbeedka bannaanada Xeebeed. Waa gobol qalalan.

**VI*. Bannaanka Jubbalaand:**


Waa bannaan fidsan oo ku yaalla badhtamaha webiga Shabeelle agagaarkiisu waa bannaan barwaaqo ah. Gobolku wuxuu u yar dhaw yahay taagga Hawd, runtiina waa taxanahiisa geeska koonfureed.

# KACAAN

Soomaaliya waxaa si fool xun ula isticmaalay gumaystaha caalamiga ah, isagoo waddankeenna shan qaybood u qaybiyey: Ingiriiska oo qayb la booday, Talyaaniga, Faransiiska, Amxaarada iyo Keenya oo Ingiriisku kolkii uu gobannimada siinayey dhul soomaali qayb ahaan u siiyey. Laakiin shacbiga Soomaaliya wuxuu gumaystaha ku qaaday halgan si waddanka gobannimo looga dhalin lahaa, shanta soomaaliyana hal calan u wada wadaagi lahaayeen; halgankaa iyo mideynta ummadda soomaaliyeed, wuxuu weli ka socdaa meelihii gumaysigu ku haray. Sannadkii 1960kii ayaa gobannimadii hantiyeen qaybihii ay kala gumaysanayeen Ingiriiska iyo Talyaaniga oo isla markiina hal calan isla wadaagey noqdayna Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

1960kii ilaa 1969kii Soomaaliya waxaa xukunka isku beddelay saddex dawladood oo shacbi ah, laakiin dawladahaas oo laga filayey inay waddanka gaarsiiyaan horumar iyo barwaaqo waxay noqdeen kuwa daneysteyaal ah oo marnaba eegayn danta guud ee shacbiga soomaaliyeed. Waxaan ka warqabnaa in doorashadii guud ee waddanka ka dhacday 26kii Maarso 1969kii ay ku qur baxeen ugu yaraan 50 ruux.

Nasiib wanaag, waxa noqotay in, 21kii Oktoobar 1969kii uu kacaan aan dhiig ku daadan waddanka ka curtay. Ma malayn kareysid sidii farxadda lahayd oo shacbiga Soomaaliya u soo dhaweeyey kacaankeenna caweysan, degmo iyo tuulo kastana waxaa laga sameeyey mudaaharaadyo lagu soo dhaweynayo kacaanka waddanka ka curtay. Kacaankuna ma noqon mid lagu khasaaray ee wuxuu noqday mid u soo celiya shacbigeenna kalsoonidii ka luntay sagaalkii sano ee dawladihii dibusocodka ahaa, waxaana taa uga marag kacaya horumarkii lixaadka lahaa ee laga gaaray muddadii gaabneyd ee kacaanku waddanka maamulayey.



# DALXIISKA

Intaynaan guda gelin horumarka dalxiisku gaaray, waxa lagama maarmaan ah inaan isweydiinno muxuu yahay dalxiisku ?, oo gaar ahaan muxuu yahay dalxiiska Hantiwadaagga ahi? muxuu kaga duwan yahay kan Hantigoosadka?

Waxa lagu tilmaamay in dalxiiska Hantigoosadka ahi uu yahay midka ay ku adeegtaan gumaysiga cusub oo u shaqaynaya shirkado iyo dad gaar ahaaneed oo loo abuuray adeegsi iyo dulnoolaad; iyadoo ujeeddada laga leeyahay ay tahay faa'iidadoo ku noqota dalalka Hantigoosadka ah. Dalxiiska Hantiwadaagga ahi wuxuu kaga duwan yahay inuu ku dhisan yahay ilaalinta mabda'a, dhaqanka iyo Hiddaha ummadda iyadoo isla markaas faa'iidadiisa xagga dhaqaaluhu ay ka mid noqoneyso hantida Dadweynaha.

Sida la ogsoon yahay dalxiisku waa booqashada qofku ku aado meel aan ahayn halka uu deggan yahay, wuxuuna u qaybsamaa:-

1. Mid nasasho, raaxaysi iwm.
2. Mid aqoon kororsi ah.
3. Mid ka qayb gal shir.
4. Mid shaqo ganacsi ah.

Mar labaad waxaynnu xusuusan karnaa siday u kala duwan yihiin booqashooyinka noocaas ah ee dadka ka imanaya dalalka Hantiwadaagga ah iyo kuwa ka imanaya dalalka Hantigoosadka ah.

Midka Hantiwadaagga ahi wuxuu la imaanayaa dalka niyadsan iyo walaalnimo iyadoo badanaaba heshiisyada imaatinka lala galay ururrada ijtimaaciga ah ee dalkaasi, ka Hantigoosadka ahi wuxuu yimaaddaa isagoo hoosta ku wata dan kale oy ka mid yihiin takhriib, dhaqanguuris iyo xumaato doon.



## KACAANKA KA HOR (1960-1966)

Waxaan oran karaa, kacaanka ka hor dalxiiska ma jirin siyaasad cad oo hawshiisa u degsan iyo haba yaraatee, goob dalxiis oo dantaa loogu tala galayna lama samayn.

Xagga siyaasadda oo ah furaha wax qabadka, maamulkii dibusocodka ahaa iskuma dayin inuu u dejiyo jid cad oo loogu soo hagaago, haddii wax laga sheegi karo, waxa maamulkaa tilmaan u ahaa ka warhayn la'aan joogto ah, inta badanna gumeysiga cusub wuu daahi jiray khayraadka dalka Soomaaliyeed lagu mannaystay ee xagga dalxiiska. Bad iyo Barriba waddanka Soomaaliya waa mid dalxiis u qalma, meelaha qaarkoodna sida Jubbada Hoose, waxa la oran karaa Soomaaliya waxay kaga horraysaa dalkastoo adduunka ku yaal xagga dalxiiska. Iyadoo sidaa ah, ayaa haddana wax ka run sheegahayaa arrintan aanu jirin. Soomaaliya waxa lagu tilmaami jirayba lama dagaan, waxaana jirtay in ugaarta oo ah khayraadka ugu waaweyn ee lagu xisaabtamo, dalkeennana aad ugu badan si dabargoyn ah loo ugaadhsan jirey. Qaar ka mid ah ugaartaas (Sida dameer farawga) oo dalkeenna oo qudha kaga hadhay adduunka oo dhan, si xoog leh ayaa loo layn jirey ama iyadoo nool ayaa dibadda loo dhoofin jirey lacag badanna laga heli jirey daawashadiisa oo qudha.

Siyaasad la'aantaasi waxay si fiican u muujinaysaa inaan maamulka dalxiiska aanu isku dubbaridnayn kacaanka ka hor. Ugu yaraan saddex wasaaradood ayaa hawlaha dalxiiska saameeya ka dhexeeyey, midna midda kale kama warhaynnin iskuduwidda hawlahaasna hadalkeedaba daayoo!

Dalku sidaan hore u tilmaanay hodan ayuu ku ahaa, ilaa haddana ku yahay xagga dalxiiska. Waxyaabaha ugu horreeya ee horumarinta dalxiisku u baahan yahay waxa weeye

jiritaanka meela la seexdo, cuntana laga cuno oo ku yaalla magaalada ama goobaha dalxiiska iyo nabadgelyo. Sida la ogsoon yahay nabadgelyo ma jirin kacaanka ka hor, waxaana la ogsoon yahay in meelo kaleba daayoo, aan magaalo madaxda nabadgelyo jirin laguna qabin. Sidaa awgeed dalxiis ma aammini karaynnin dal sidaas ah, taasina waxay keentay in sharaftii iyo magacii dalka iyo dadkuba ay ku baaba'aan.

Magaala madaxdu waxay lahayd laba huteel oo yar-yar (Jubba iyo Shabeelle) muddo badanna dhisnaa, intaa wax dhaafsan oo dalxiis loogu tala galayna ma jirin dalka, wax shirar caalami ah oo lagu qaban jiray ama lagu qaban kari lahaana ha sheegin. Sidaa daraadeed Dalxiisku wuxuu ahaa wax aan tirsanayn, siyaasad ahaan, maamul ahaanna aan dhisnayn.

## INTII KACAANKU JIRAY (1969 — 1975)

Kacaankii Oktoobar wuxuu dhaxlay xaalka aan ku soo ifaynay kor: «DAL DALXIIS OO DAD DALXIIS AHI ʟANEY IMAN KARIN NABADGALYO IYO SIYAASAD ..A'AAN; IYO MAAMUL KALA DHANTAALAN AW- ..EED.»

Markii uu kacaanku dhashay khatarta ugu weyn ee taagnayd waxay ahayd iyadoo ugaarta dalku dabargoyn ku dhawaatay, dad iyo dawladna loo guntaday sidii lacag xaaraan ah halkaa looga shaqaysan lahaa iyadoo si toos ah ama si leexsan, loogu adeegayo gumaysiga cusub ee caalamiga ah ee boobka ku hayey khayraadka adduunyada saddexaad. Mahad waxaa leh kacaankeennii Oktoobar ee arrintaa dabarka u gooyey. Tallaabooyinkii ugu horreeyey ee kacaanku qaaday waxaa ka mid ahaa sharci lagu xaaraantinimeynayey ugaadhsiga nooc kastaba ha ahaadee.

Sharcigaasi wuxuu soo baxay bilihii ugu horreeyey ee ka danbeeyey dhalashadii kacaankeenna, waana loo baahnaa. (Tallaabadaa ugu horraysay ee kacaanku ka qaadey xagga badbaadada ugaadha dalkeenna waxay ahayd mid khayr u noqotay horumarinta dalxiiska).

## DHISMAHA GOOBAHA DALXIISKA

Goobaha dalxiiska waxa loo yaqaannaa in laga helo wax allaaliyo waxa qofka dalxiiska ahi u baahan yahay marka laga bilaabo hoyga uu seexanayo ilaa dhulka uu u daawasho tagayo. Xagga huteellada ama guryaha la seexdo horukac weyn ayaa laga gaaray intii ka danbaysay curashadii kacaankeenna. Halkii laba huteel oo yar-yar oo qudha laga heli jiray, maanta magaala madaxda dalkeennu waxay ku faani kartaa huteello waaweyn, waxaana huteelladaa ku kordhay 400%. Intaa waxa soo raaca tuulada «Waamo» ee Kismaayo oo u dhiganta goobaha dalxiiska kuwa ugu quruxda badan ee adduunka.

Waxaa kaloo Jubbada Hoose laga sameeyey xero ugaareed (National Park) oo loogu tala galay in dalxiiska loo daawasho geeyo. Hawlahaasi laga qabtay xagga kordhinta Huteelladu awood waxay inoo kordhiyeen in aan ku keenno waddanka dad ah dalxiis.

Xagga siyaasadda, sidaan horeyba u tilmaannay, horumarinta dalxiisku weli ma noqon mid ka hormari kara xubnaha kale ee dhaqaalaha iyo bulshada dhismaheeda, sidiisabana dalxiisku faa'iido iyo khasaaraba waa u leeyahay xagga dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasaddaba, waxa soo baxaana hadba wuxuu ku xidhan yahay sida loo maamulo. Furaha maamulku waxa weeye fikradda siyaasiga ah ee lagu hoggaaminayo maamulkaasi. Gumeysiga cusubi wuxuu ka dhaadhiciyey adduunka saddexaad in horumarinta dalxiisku tahay lagama maarmaan. Sidaa awgeedna u mutaysto in xoogga la saaro si dalkaasi horumar degdeg ah u gaaraan, waxaanse ognahay in fikraddaasi tahay mid ku dhisan siyaasadda hantigoosadka caalamiga ah ee jidka toosan ka habaabisa dalalka soo korava si ivana av uga faa'iidaysato dadvowgana ugu dulnoolaato, siday weligeedba samayn jirtey. Intaas oo dhan waxay ugu soo gabbataa magaca «Horumarinta», wa-

xaase isweydiin leh marka faa'iidada halkaa ka soo baxaysa oo dhammi ay dib ugu noqonayso jeebka hantigoosadka adduunka iyo kuwa iyaga ku xidhan, maxaa ka soo gaadhaya dadweynaha oon dhibaato, iyo dibindaabyo ahayn? Waxba.

Siyaasadda kacaanku markaa waxa weeye in horumarinta dalxiisku aaney noqon mid ka hor timaadda dhismaha bulshada Hantiwadaagga ah ee waa iney noqotaa mid kaalmeynaysa hirgelinta siyaasaddaasi una hoggaansan qorshaha guud ee dhaqaalaha dalka loo dhigay.

Taa micnaheedu waxa weeye in laga digtoonaado gafafka ay sameeyaan dalalka soo koraya qaarkood markay siyaasadda gumaysiga cusub ee xagga dalxiiska qaataan.

Badanaaba waxa laga fakiraa sidii loo kordhin lahaa dalxiiska, waxaase lagama maarmaan ah sidii dalxiiska loogu samayn lahaa qorshayn himilo dheer leh, loona waafajin lahaa qorshaynta guud ee horumarinta dalka.

Haawaay ama Sablaale sideen uga dhignaa meel aan cuntadeenna ka soo saarro isla markaana ugaga faa'daysanno dalxiis ahaan?.

Guud ahaan dalkeenna intee iyo halkeen ugu talagali karnaa dalxiis, innagoo maskaxda ku haynna dabeecadda dalxiiska? Si siyaasaddaasi loo hirgeliyo ayaa hadda loogu jiraa xogbaarid ballaaran oo dalkoo dhan saamaynaysa, ujeeddadeeduna tahay sidii loo sugi lahaa goobaha ku habboon dalxiiska, iyo sidii wax looga qaban lahaa.

Inta xogbaarista ballaarani dhammaanayso, waxa xoogga la saari doonaa tababarka shaqaalaha, kordhinta goobaha (Xamar, Marka, Jawhar, Hargeysa iyo Ceerigaabo), iyo fidinta dalxiiska. Waxa kaloo la sii xoojin doonaa dalxiiska gudaha oo sannadkii hore la bilaabay.

Ujeeddada ugu weyn ee dalxiiska gudaha laga leeyahay, waxa weeye mid siyaasi ah. Waxay Wakaaladdu ku tala jirtaa inay si dhakhso ah u bilawdo dalxiis lagu tago meelaha cusub ee beelaha danwadaagta beeraleyda iyo Kalluumaysatada (Kurtun-waarey, Sablaale, Baraawe, iyo Dujuuma).



Sidaan kor ku sheegnay kacaanku tallaabooyin dhaxal gal ah ayuu ka qaaday xagga horumarinta dalxiiska, haddii loo eego heerkii uu taagnaa markuu kacaanku dhashay. Hawlihii la qabtay waxay awood inoo siiyeen in dalxiis kooban la furo. Dalal dhawr ah (Iswidan, Yugoslaafiya, Midowga Soofiyeeti, iyo Talyaaniga) heshiisyo kala gooni ah ayaa lala galay, lana filayo inay si joogto ah u hirgalaan. Hase yeeshee su'aashu maaha intee qof oo dalxiis ah ayaan rabnaa ama aan keeni karnaa ee ta habboon ee siyaasadda kacaankeenna la socon kartaa waxa weeye imisa qof iyo kuwa jaadkeeya ayaan diyaar u nahay inaan keenno?.

## DEJINTA MARTIDA IYO DALXIISIINTA

Dadka dalxiiska ah een hore u soo sheegnay iyo ciddii kale ee ku soo korodhaba waxa maamulka Dalxiisku u diyaariyey Huteellada ku baahsan Jamhuuriyadda. Tirada huteellada dadka la dejin karaa way toban laabmeen, inkastoo lagu talo jiro in waliba la sii kordhiyo.

Waxay huteelladaasi martida diyaar ula yihiin jiif, cunto iyo cabbid kala jaad ah iyo khidmooyin kale oo ay ka mid yihiin:-

B. Hoggaamin

T. U sahlid xagga warbixinta siiba meelaha muhimka ah oo dadku u baahan karo.

J. U sahlidda xagga isgaarsiinta.

X. Baahitirka waxyaalaha yar yar ee qofku u baahan karo.

Huteellada sidan u diyaarka ahina waxa ka mid ah:

1. Huteelka Jubba
2. » Shabeelle
3. » Taleex
4. » Bulsho
5. » Curuuba oo cusub
6. » Tuulada «Waamo»
7. » Hargeysa Kilaab
8. » Safaari
9. » Jawhar oo cusub.

## HORUMARINTA DALXIISKA

Dalxiisku wuxuu ka mid yahay tiirarka dhaqaalaha dalka, waxaanu la mid noqon karaa Warshadaha, Beeraha iyo meelaha kale ee dawladda dakhligu ka soo galo. Run ahaantii waxa dalxiiska lagu tilmaamaa beryahan danbe warshad khidmad sare «serie» soo saarta. Haddaba iyadoo la tixgelinayo siyaasadda kacaanka oo ah inay xubnaha kale ee dhaqaaluhu ka hor maraan Dalxiiska, ayaa isla markaasi lagu tala jiraa inuu dalxiisku higsado horumarka xubnahaasi iyo in aanu dalxiisku hadhin ee uu ka faa'iidaysto horumarka laga gaaray beeraha, warshadaha iyo waddooyinka waaweyn ee dalka isku xira. Sidaa daraadeed hay'adda Dalxiisku waxay qaban qaabisay sidii loo heli lahaa goobaha ku habboon Dalxiiska, taasina way ku guulaysatay iyadoo xoogga saartay habaynta iyo isku dubbaridka dalxiiska, dalxiisiinta dalka yimaaddana raalli gelin kara. Taasi waxa ka marag kacaya goobaha loogu tala galay dadka dalxiiska u yimaadda dalkeenna.


Goobahaasi loogu tala galay tamashlaynta dadka dalxiiska u imanaya dalkeenna, waxa ka mid ah xerooyinka ugaadha, oo ay ku badan yihiin xayawaanku sida maroodiga, jeerta, wiyisha, dameer farowga, geriga, shabeelka, mukulaalka ama bisad shabeelka, libaaxa iyo shimbiro kala geddisan.

Goobahaasi oo laga mamnuucay in laga ugaarsado, waxaa ka mid ah Laag badane, Geedka dabley iyo meelaha u dhaw Muqdisho iyo Hargeysa. Waxa kaloo ugaadha aad loogu ilaaliyaa Degmooyinka Boorama, Bush-bush iyo dhinaca bidixeed ee Webiga Jubba.


Waxa dadka dalxiiska u yimaadda dalkeenna aad u soo jiita midabyada kala geddisan ee Abeesada, Jabisada, kuwaasoo hargahooda markii si cilmi ah loo fiiriyey ay noqdeen kuwa ku habboon in laga sameeyo boorsooyinka dumarka iyo kabaha ragga iyo dumarkaba.


Haddii aan fiiro gaar ah siinno dalxiiska xagga badda oo aad iyo aad ugu dheer qofka dalxiisyahanka ah, dalkeennu wuxuu leeyahay xeebaha ugu dhererka badan qaaradda Afrikada xorta ah taasi oo lagu qiyaasay in ka badan 3000 oo kiilo Mitir, waxayna weliba ku taallaa meel aad muhiim u ah, quruxdeedana adduunku qirsan yahay.


Meelaha u dhaw xeebaha ee loogu tala galay ugaadha, waxay dadka dalxiiska ku yimaadda dalkeenna u sahlaysaa inay si deggan oo nabad galyo leh uga ugaarsadaan ama ay daawadaan xoolaha kala jaadka ah ee laga helo badda gudaheeda, iyagoo weliba halkaasi kula kulmi doona soo dhaweynta diirran ee dadka Soomaaliyeed ku caan baxeen.
















# HIDDAHA IYO DHAQANKA

Marka la soo koobo Hiddaha dalkeennu wuxuu ka kooban yahay, Af iyo Murti, Farsamo, fan, fiiro ama fikrad iyo alaabo ama qalab. Murti waxaan oran karnaa wax allaala wixii odhaah ah oo si farsan loo dhigo iyadoo sheegaysa fikrad, fiiro ama falsafad. Fanka waxaa soo geli kara wax allaale wixii si farsan loo sameeyo ama ka baxa iskaashiga fikradda, iyo gacanta dadka oo noqota wax lagu adeegto oo si maaddi ah loo isticmaalo ama wax muuqaalkiisa ama maqalkiisu ku raalligeliyo oo la jeclaysto. Alaabaduna waxay noqon kartaa wax allaala wixii gacanta dadka ka soo baxa ee maaddi ah.

Intii dawladihii musuq-maasuqa ahaa dalka maamulayeen, xaalka Hiddaha iyo Dhaqanku wuxuu ku sugnaa dulli iyo dayro. Siyaasadihii dawladahaasina waxay la xiriireen kuwii gumaystaha ee liddiga ku ahaa qarannimada iyo midnimada ama mudnaanta ummadda Soomaaliyeed.

Maantase waxaa jirta siyaasad cad iyo aragti horusocod ah oo ku qotonta mabaadii'da hawl iyo hantiwadaagga, iyadaana hoggaaminaysa aayaha danbe ee habaynta hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed. Taa waxaa keentay hirgelintii qodobbadii kacaanku ku ballan qaaday inay saldhig u noqdaan isbeddalka bulshada Soomaaliyeed ay ka mid ahayd noolaynta iyo dhismaha Hiddaha iyo Dhaqanka. Tallaabooyinkaa horukaca ah iyo Guulaha laga gaaray waxaa ka mid ah:

1) Qoritaanka Far Soomaaliga oo lagu dhawaaqay 21kii Oktoobar 1972kii iyo Ololayaashii ku taxnaa hirgelintiisa.

2) Dhismaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee 3dii Abriil 1973kii.

3) Dhismaha Akadamiyaha Dhaqanka oo ahayd hay'-ad ka tirsan laamaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare una gaar ah ururinta, baarista, iyo habaynta afka, suugaanta Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.

4) Habaynta Golaha Murtida iyo Madadaalada iyo Dhismaha kooxaha **«Waaberi, Horseed, Heegan»** kooxda waaberi waxay leedahay koox ciyaartoy ah oo u caan baxday ciyaaraha Hiddaha iyo Dhaqanka.

5) Dhismaha Iskaashatooyinka Farshaxanka ee Wasaaradda Warshadaha.

6) Dhismaha Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed ee Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda.

7) Dhismaha Golayaasha hanuuninta dadweynaha ee X.H.K.S.

8) Soo gelinta barashada muyuusigga manhajka dugsiyada.

9) Abuurista iyo fidinta dhaqdhaqaaqyada dhallinyarada sida Ubaxa, Ceel Jaalle, iyo Mahrajaannada.

Tallaabooyinkaasi oo dhan oo ah kuwa lagu dhisay hay'ado hirgelinaya himilooyinka Kacaanka ee xagga Hiddaha iyo dhaqanku, waa kuwa maanta kaalin weyn kaga jira horumarka Ummadda. Faa'iidooyinkay soo celiyeenna waa kuwo dhaxal gal ah oo ummaddu si dhab ah ugu ayday adduunweynuhuna u aqoonsaday.

Hay'adanaa kor ku sheegan oo dhan waxaa waajibkoodu yahay soo nooleynta, Dhisidda iyo Faafinta dhaqanka, xilkaana waxay ku fulinayaan iyago:

b) Barbaarinaya Akadamiyaha Dhaqanka;

t) Wax ka qabanaya Miyuusiyamyada dalka.
j) Dhisaya, habaynaya, fidinayana maktabadaha dalka.

x) Wax ka qabanaya, dhiirrigelinaya, cilmiyeynaya dhaqanka, Murtida iyo Madadaalada.

kh) Dhiirrigelinaya, cilmiyeynaya dhaqanka muusikada.

d) Dhiirrigelinaya, habaynaya, una korinaya dhaqankeenna ciyaaraha si ay ugu fillaadaan ummadda dookheeda ilbaxay.

**Rugta Kutubta Ummadda:**

Aqoonta iyo Teknoolajiyada bani'aadanku waxay ku kaydsan tahay kutubta. Si loo abuuro ummad aqoontaasi isku dhista iskuna barwaaqaysa, waxaa lagama maarmaan ah in ummaddaasi laga dhigo mid si joogto ah wax u wada akhrisata. Maktabaduhu waa dugsiyada koowaad ee kobciya, kartida, siiyana aqoonta iyo teknoolajiyada ummadda. Sidaasay lagama maarmaan u noqotay dhiirrigelinta iyo fidinta golayaasha wax akhrisku. Kacaanku wuu arkay baahida loo qabo Maktabadaha waxaana qorshaha shanta sannadood ee (1974-1978) lagu daray kharaj arrintaasi wax lagaga qabanayo; taallaabooyin fiicanna waa laga qaaday.


**Miyuusiyamka Ummadda:**


Muusiyamku waa khasnadda ugu weyn ee lagu ururiyo wax allaala wixii qiimo leh ee ku saabsan hiddaha, dhaqanka, taariikhda, fanka, iwm.
Si loo ogaado loolana socdo heerarka kala duwan ee horumarka Ummaddu soo martay, sidaa daraadeedna, xilka saaran Miyuusiyamku waa ururinta, kaydinta iyo ilaalinta alaabada taariikhda leh.

Waxaa Miyuusiyamka ahmiyad weyn la siiyey oo loo qaddariyey inuu yahay lagama maarmaan intii Kacaankii samawade dalka muumulkiisa hayey.









# Wasaaradda Warfaafinta iyo H. Ummadda

Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda oo magacaas loo bixiyey markii uu curtay kacaanku iyadoo la oran jiray markii hore Wasaaradda Warfaafinta oo kaliya waxay u kala qaybsan tahay :-

1. Waaxda Idaacadaha Soomaaliyeed
2. Waaxda Qoraalka
3. Golaha Murtida iyo Madadaalada
4. Wakaaladda Wararka «SONNA»
5. Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed
6. Wakaaladda Madbacadda Qaranka.

Intaas oo Waaxood iyo Wakaaladood waxay har iyo habeen u soo jeedaan oo uu dadweynuhu ka markhaati furayaan inay hirgeliyeen ujeeddooyinka kacaankeenna iyagoo ogsoon guulaha kacaanku inay ku xiran yihiin hadba sida dadweynaha ballaaran ee Soomaaliyeed ay ugu xiran yihiin ama ay ula socdaan ujeeddooyinka kacaankooda. Waxaa jirta in qaybaha Wasaaraddu ay u gutaan waajibaadkooda siyaaba kala duwan, ama qayb kastaaba ay raacdo waddo iyada u gaar ah oo ku habboon hawshaa ay u hayso dalka. Haddana waxaan ka hadlaynaa, Waax kasta ama Wakaalad kastaa hawsha ay hayso iyo horumarka ay gaartay toddobadii sannadood ee uu kacaanku dalka maamulayey.

WAAXDA IDAACADAHA SOOMAALIYEED.

Waaxdaasi waxay ku hadashaa codka ummadda waxaana ka dhacay isbeddal weyn intii ka danbaysay kacaankii 21kii Oktoobar, 1969kii, xagga habka qormeynta hawlaha, farsamada iyo guud ahaan ka qayb galka dhismaha dalka. Xilka ugu weyn oo ay ku guulaysatay Waaxda Idaacaduhu wuxuu ahaa kicinta dadweynaha Soomaaliyeed oo ay had iyo jeer u baahinaysay tilmaamaha iyo tusaalooyinka kacaanka, waxaana la suura geliyey inay heerkaa gaarto iyadoo gaarsiisey magaala madaxda iyo gobollada dalka, qalab wax laysku gaarsiiyo si ay ugu fududayso dadka aan lahayn Raadiyayaal gaar ahaaneed inay waxa laga sii daayo idaacadaha ha ahaadeen arrimaha dalka gudihiisa ka dhaca ama adduun-weynaha kalee ay ka dhegaystaan meelaha ay deggan yihiin. Magaalada Xamar waxaa laga dhisay saddex saldhig oo ay dadweynuhu ka dhagaystaan Idaacadaha, 11 gobolna waxay Idaacaddu siisay qalabka warka lagu baahiyo oo ka kooban :

B. Raadiyayaal — T. Warbaahiyeyaal — J. Qalabka warka xoojiya. Waaxda Idaacadaha Soomaaliyeed waxaa kaloy hirgelisay mashruuca Telifoonka warka si toos ah loogu soo tebiyo, in lagu soo xiriiriyo Istuudiyaha Raadiyo Muqdisho waxaana suura gashay, meelaha waaweyn ee ay ka mid yihiin Golaha Murtida iyo Madadaalada, Guriga Ummadda, Gegida Kubbadda Cagta iyo Gobol kasta oo dalkeenna ah oo Telefoon leh, in lagu soo xiri karo Istuudiyaha Raadiyo Muqdisho oo markaa ka dib aad ka dhagaysatid adigoo gurigaaga fadhiya. Sida ay dadweynuhu ula socdaan, hawsha Raadiyo Muqdisho iyo Hargeysa waa mid aad u ballaaran oo u baahan in 24 saac si joogto ah looga shaqeeyo. Raadiyuhu wuxuu maalin walba hawada ka sii daayaa toddoba goor, warka gudaha iyo ka dibadda wuxuu sii daayaa barnaamijyo kala geddisan oo taabanaya xubin kasta oo ka mid ah nolosha dadweynaha iyo hawlaha ka socda dalka isagoo had iyo jeer la socodsiiya barnaamijyada kale ee degdegga ah.

Intaa waxaa u dheer Khudbadaha Madaxweynaha, golayaasha hanuuninta iyo isagoo la socodsiinaaya dadweynaha mashruuc kastoo ka hirgala Gobol kasta ama degmo kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda waxaana u suura galay

qofkastoo la socda barnaamijyada Raadiyaha inuu ka war qabi karaayo horumarka uu gaaray gobol kasta, isagoon booqasho ku tagin.

Barnaamijyadii ka baxay Raadiyo Muqdisho 1969 Oktoobar ilaa 1976kii waxay ahaayeen 16,281. Haatanna toddobaad walba waxaa ka baxa 52 barnaamij, 1974kiina waxaa ku soo kordhay 6 barnaamij oo kala ah:-

1. Barnaamijka Tafsiirka Quraanka
2. Tacabka Beeraha
3. Codka Macallinka
4. Garsoorka
5. O.H.R. Miyiga
6. Ogaanshaha iibka.

Barnaamijyada ka baxa Raadiyo Muqdisho waxay yihiin sagaal luqadood oo ay ka mid yihiin :-

Soomaaliga; Ingiriiska; Talyaaniga; Faransiiska; Carabiga, Gaalaha, Amxaariga. Cafarta iyo Sawaaxiliga. Haddii aan fiiro gaar ah siinno afka Soomaaliga oo ah Afka Hooyo, iyadoo la ogsoon yahay in Ummadda Soomaaliyeed uu u leeyahay ahmiyadda ugu weyn, waxa awood loo siiyey wakhtiga ugu badan ee baahinta Idaacadda, wuxuuna barnaamijkaasi bilaabmaa subaxdii saacaddu markay tahay lixda aroornimo (6.00) iyadoo uu ka baaho labada mawjadood ee 49ka iyo 312ka.

Barnaamijkaasi wuxuu socdaa habeenkii ilaa laba iyo tobanka (24.00), si ummadda Soomaaliyeed ay ula socoto wararka gudaha iyo kuwa dibaddaba. Wakhtiga Barnaamijyada ka baaha Raadiyo Muqdisho marka la isugeeyo waxay noqonayaan 38 saacadood maalintiiba. Barnaamijyadaasi kala duwan ee ka baaha Raadiyo Muqdisho waxaa ka mid ah:- Barnaamijka Shaqada iyo Shaqaalaha.

» Baraarujinta Barbaarta.
» Maxay qabatay Tawraddu.
» Hantiwadaagga.
» Caafimaadka.
» Faaqidaadda Arrimaha Adduunka
» Ciyaaraha.
» Tafsiirka Quraanka.
» Xannaanada Carruurta.
» Kadis.
» Maaweelada iyo Madadaalada.
» Weydiin iyo Warcelin.
» Dhaqaalaha.
» Korodhso Garaadkaaga Siyaasadeed
» Xannaanada Xoolaha.
» Beeraha iyo Iskaashatooyinka.
» Warshadaha iyo Barnaamijyo kala duwan oo hadba laga baahiyo Raadiyaha kuna saabsan booqashooyinka iyo qaaradda Afrika.

Waxaa kaloo jira barnaamijyo kale oo aan joogto ahayn, hase yeeshee waxay la socdaan hadba sida uu ugu baahan yahay dadweynuhu ama siyaasadda guud ee dalka. Tusaale ahaan, waxaynnu ogsoonnahay in uu ka socday dalka dhammaantiis Ololaha Horumarinta Reer Miyiga kaasoo ay Waaxda Idaacaduhu qayb weyn ka qaadatay. Haddii aynnu eegno kaalinta ay ka qaateen Idaacaduhu faafinta Afka Hooyo, waxaynnu ogsoonnahay in maalin walba ay ka baxaan Idaacadda barnaamijyo kala duwan oo ku saabsan Farta Hooyo iyo waxbarashada Guud, kuwaasoo ay dadka Soomaaliyeed ka bartaan qoraalka afkooda.

Intii dawladda Soomaaliyeed ay ka mid noqotay Ururka

dawladaha Carabta, Idaacadaha Soomaaliyeed xiriir wanaagsan ayey la yeesheen ururka Idaacadaha Carabta oo dhan.

## WAKAALADDA WARARKA (SONNA)

Wakaaladda Wararka Soomaaliyeed (SONNA), waa Wakaaladda keliya ee ka mas'uul ah inay soo ururiso wararka Gobollada iyo Degmooyinka uu ka kooban yahay dalku, iyadoo isla markaa u qaybisa Idaacadaha iyo Wargeysyadaba.

Wakaaladda Wararku waxay u soo ururisaa waxyaabo badan, oo ay ka mid yihiin in wariyayaasha Wakaaladdu ay ka soo qoraan wararka Wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Laamaha kala duwan. Wariyayaal joogto ah ayaa u fadhiya magaalooyin madaxda Gobollada mararka qaarkoodna weriyayaal ayaa ku soo mara dalka kormeer, si ay wax uga soo qoraan hawlaha faraha badan ee ka socda waddanka. Wakaaladdu waxay Teligaraamyo ama waraaqo ay ka heshaa xarumaha Booliiska iyo Xafiisyada Gobollada.

Wakaaladdu waxay kaloo wararka dunida ay ka heshaa Wakaaladaha caalamiga ah oo ay ka mid yihiin:- AFP, TASS, REUTER iyo kuwa la mid ah. Taasi waxay ku suura gashay Wakaaladda oo haysata qalabka warka lagu qabto. Wakaaladda Wararka Soomaaliyeed waxay u kala baxdaa qaybo fara badan - Qaybta wararka gudaha, dibadda, qaybta dhageysiga Raadiyayaasha iyo qaybta warka soo tebisa.

Tusaale ahaan haddii aynnu u qaadanno sida ay Wakaaladdu ku hesho wararka dalka, waxaa jirtay 1969kii Wakaaladdu inay-yan ku lahayn wariyayaal Gobollada dalka, laakiin maanta uu gobol kastaa leeyahay wariye u gaar ah, marka laga saaro gobolka Banaadir oo ay ku taallo magaala madaxda Dalku.

Hawsha Wakaaladdu way fara badan tahay, isbaddalna wuu ka dhacay, taasoo sabab ay u tahay hawlaha waddanka oo sii kordhaya sannadba sannadka ka danbeeya.



## QORAALKA

Haddii aan u soo leexanno dhinaca qoraalka, waxa laga war qabaa wargeysyadii iyo buugaagtii dalka laga soo saari jiray in lagu qori jiray afaf shisheeye, taasoo keentay qoritaanka buugaagta oo aad u koobnaa, sababna u ahayd inaysan jiri jirin Far Soomaali ahi taasoo muujinaysay tirada dadka wax akhrisan jiray oo aad u yareyd kuna koobneyd dad yar oo bartay afafka shisheeyaha.

21kii Oktoobar 1972kii ayaa lagu dhawaaqay qoraalka farta Hooyo, oo noqotay luqadda rasmiga ah ee dalkeenna,

durbadiibana waxa lagu dhaqaaqay Olole far barasho oo isdaba joog ah laguna hirgelinaayey barashada Farta Soomaaliyeed.

21kii Jannaayo 1973kii, Wargeyskii ugu horreeyey ayaa ku soo baxay farta Hooyo, oo maalinba maalinta ka danbaysa sii xoogeynayey baahinta farta Hooyo. Wixii ka danbeeyey 21kii Jannaayo ee 73kii oo ah maalin taariikh weyn u noqotay qoraalka dalka gaar ahaanna Wargeysyada, waxa aad u kordhey akhristayaasha Wargeysyada iyo wax qorayaasha.

Sida la ogyahay, markii la qoray farteenna, waxaa ballaartay waajibaadka wargeysyada ka saaran fidinta aqoonta guud, gaar ahaanna wararka gudaha iyo kuwa dibadda, maxaa yeelay waagii hore waxaa wargeysyada akhrisan jiray oo kaliya dadka waxbartay oo tiradoodu aad u yarayd, laakiinse haatan waxaa akhrisan kara dadweynaha Soomaaliyeed. Ujeeddada ugu weyn ee ay fuliyeen Wargeysyadeennu toddobadii sannadood ee kacaanku maamulaayey dalka, waxay ahayd hanuuninta dadweynaha, faafinta mabda'a Hantiwadaagga, Horumarinta dhaqaalaha, mashaariicda horumarinta iyo faa'iidooyinka ay leeyihiin iskaashiga iyo wada shaqayntu.

Warfidiyeennada iyo Wargeysyadu waxay door weyn ka qaateen xilna iska saareen la dagaallanka fikradihii hore, iyagoo u muujiyey dadweynaha dhibaatooyinka ay u lahaayeen hawlihii ka socday dalka.

Waaxda Qoraalka ee Wasaaradda Warfaafintu waxay soo saartaa Wargeysyada ay ka mid yihiin; Xiddigta Oktoobar oo afka Hooyo iyo ka Carabiga ah ku hadasha maalin walba., Waaga Cusub oo ku soo baxa afka Soomaaliga, Ingiriisiga, Carabiga iyo Talyaaniga oo soo baxa bil walba waxaana loogu tala galay inay gaarsiiyaan dadka shisheeyaha ah isbaddalka ka socda dalkeenna, iyo tallaabooyinka ay qaadayaan dadweynaha Soomaaliyeed iyagoo xooggooda kaashanaya.

Waxaa kaloo la soo saaraa buugaag fara badan oo ku soo kala baxa afaf badan, kuwaasoo lagu qoro warar iyo maqaalado tifaftiran oo ka warramaya xubin kastoo dalka ka mid ah iyo isbaddalka ka hirgaley dalka, iyagoo isla markaa ku muujinaya horumarka la taaban karo ee dalka ka socda.

## WAKAALADDA FILIMMADA SOOMAALIYEED

Wakaaladda oo la abuuray 1973kii, waxay qayb weyn ka qaadatay habaynta iyo horumarinta Filimmada iyo Masawirrada. Ujeeddooyinka ugu waaweyn ee loo abuuray Wakaa laddaasina waxay tahay in dadkeenna iyo dadyowga kalaba loo muujiyo isbaddalka bulshannimo ee ka dhacay dalka xag walba haddii laga eego, iyo in lala socodsiiyo Ummadda Soomaaliyeed sida ay u socdaan hawlaha lagu hor marinaayo dalka oo sannadba sannadka ka danbeeya sii ballaaranaaya.

Wakaaladdu waxa ay soo saarto waxa laga daawadaa dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, haddii aan tusaale ahaan u soo qaadanno dalka gudihiisa Filimmada hanuuniska ah, waxa daawaday dad tiradiisu aad u badan tahay laguna qiyaaxa si karo 95%, taasina waxaa u sabab ah in Wakaaladdu ay hawlaheedii ku fideen Gobollada oo dhan, lana geeyey baabuurro wata Filimmo iyo qalabkii Filimmada loo adeeganaayey.

Hawlaha faraha badan ee ay Wakaaladdu qaranka u hayso, waxay ku fulisaa iyadoo u furta shaqaalaheeda tababarro isdaba joog ah oo u kordhinaaya aqoonta Filimmada iyo Masawirrada, si ay uga soo baxaan xilka ka saaran soo saaridda Masawirro wanaagsan iyo Filimmo ay dadweynuhu daawadaan, si looga kaaftoomo kuwii shisheeyaha, taasina way ku guulaysatay Wakaaladdu waxayna soo saartay Filimmo casri ah oy ka mid yihiin Filimkii caan baxay ee (DAN IYO XARRAGO), waxayna ku tala jirtaa inay sii kordhiso dadaalkaa oo ay dadweynaha ka baahi tirto Filimmada iyo Masawirrada.

## WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

Hay'adaha iyo wakaaladaha la xiriira ama hoos yimaadda Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda ayey ka mid tahay Wakaaladda Madbacadda Qaranka. Baahida loo qabo madbacad wax lagu daabaco iyo doorka ay ku leedahay qaabka dhismaha dawladnimo waxay ahayd mid aan la siinnin ahmiyaddii ay mudnayd iyo daymadii ku habboonayd intii ka horreysey dhalashadii kacaankii 21kii Oktoobar, 1969kii, sababtu si kastaba ha ku dhacdee. Taasise, dhaqaale ahaan, farsamo ahaan iyo maamul ahaanba waxay la qabtay waaxyaha kaleeto ee dawladda oo ay la wadaagaysay qalladdii madaxa kaga yuururtay dalka.

Dhismaha qaabka madbacad gaar ahaaneed ee wakaaladda waxa seeska loo qotomiyey waayihii xukunkii Qarammada Midoobay ee dawladdii daakhiliga ahayd. Waxay soo dhalatay 1950kii iyadoo markaa ku magacawnayd WAKAALADDA GAARKA AH EE MADBACADDA DAWLADDA», (Azienda Speciale Stamperia dello Stato). Waqtigii ay dhalatay waxa maamulkii Qarammada Midoobay (United Nation Trusteeship) u dejiyey qawaaniin iyo maamul habaysan oo loo qorsheeyey socodsiinta hawlaha la xiriira madbacadda. Ujeeddooyinkii markaa loo qotomiyeyna waxay ahaayeen:

1) Inay socodsiiso hawlaha daabacadda iyo soo saa-



ridda qalabka Xafiisyada (Stationary) ee dalka looga baahan yahay.

libka iyo gadisto alaabta Xafiisyada lagaga shaqeeyo iyo qaybintooda meelaha looga baahan yahay.


Shaqaalaha iyo heerka wax soo saariddeeduna intaa oo qudha ayey ku koobnaayeen, iyadoo ay ugu waconaayeen qalabka iyo makiinadaha wax lagu daabaco oo aad ugu yaraa, sancadooda oo aad u dambaysey iyo iyadoo aanay jirin dad aqoonta madbacadaha ku xeel-dheer oo ka shaqayn jiray, amaba mugga wax soo saarkeeda loo habeeyey heer ay ku daabacdo waxyaabaha yaryar ee markaa maamulka dawladdu u baahan yahay iyo inay qaybiso wixii ay soo saarto.


Ma aha wax la yaab leh haddii aynnu nidhaahno muddadii 19ka sana ahayd ee ka dhaxaysey 1950kii, dhalashadii Madbacadda ilaa 1969kii, dhalashadii Kacaanka Oktoobar, heerka iyo muggeeda wax soo saarku ma dhaafin daabacaadda Wargeysyadii dawladda iyo qaybinta waraaqaha iyo qalabka kale ee Xafiisyda oo aan iyagana si wax-ku-ool ah (efficient) loo socodsiin jirin.

Xataa wax kale daayoo, heerkii wargeys daabicidda iyo waraaqa qaybinta ahayd ayey hoos uga dhacday. Dhalashadii Kacaankii Oktoobar, oo u dejiyey sharcigii ugu horreeyey ee lagu soo noolaynayey shaqada wakaaladda ee Lambarkiisu ahaa 3, Jannaayo 1dii 1971kii wuxu u suurageliyey inay kasoo kacdo bannaankii ay fadhiday, ayna ka kordhiso heerkii wax soo saarkeeda iyo xilka ay waddanka iyo Ummadda u hayso.

Hab maamulka cusub iyo qorshaha tifaftiran ee loo dejiyey socodsiinta shaqada madbacadda si ay u kafaala qaaddo xilka ummadda iyo baahida waddanka: isku keenidda qalabka madbacadahii kala firidhsanaa ee la toleeyey, midaynta shaqadeeda, keenidda qalabka ee ah kuwa lagaga dhaqmo dunida maanta, kordhinta aqoonta farsamo, garaadka siyaasiga ah iyo waayaha cilmiyeed ee shaqaalaha Madbacadda oo muddadii yarayd ee Kacaanka dhalashadiisa ka dambaysay si habboon la isugu duway dhammaantood, waxay isugeyntoodu dhalisay heerka sare ee wax soo saaridda madbacaddu gaadhay oo ka kor maray tii sannadkii 1969kii in ka badan 10 laab.

Horumarka aan la qiyaasi karin ee ay wakaaladdu gaadhay intii ka dambeysey dhalashadii Kacaanka oo kaabtay kaalintii laga sugayey inay buuxiso wax alliyaale wixii daabacan ee waddanka laga isticmaalo, nooc kastoo ay yihiinba, waxay ka muuqataa heerka uu gaadhay dakhligeeda guud iyo macaashka ay Ummadda u soo hoysey.







# WAXBARASHADA

Waxbarashada dalku waxay ahayd mid aad u hoosaysa intii ay dalka ka talinayeen isticmaarkii iyo dawladihii musuq-maasuqa ahaa ee ka danbeeyey. Sidaan ka war qabno kacaankii Oktoobar wuxuu dhaxlay bulsho muddo dheer ku soo jirtay dibudhac iyo mugdi, xagga dhaqanka, dhaqaalaha, iyo xagga siyaasaddaba. Waxay ahayd bulsho soo dhadhamisay dhaqan-rogid, cadaadiska isticmaarka iyo dibusocodka isaga u adeega. Waxa markaa waajib ku noqday kacaankii dhashay 21kii Oktoobar 1969kii inuu jabiyo oo uu furfuro silsiladdii dulliga, taasoo uu ku caddeeyey axdigii ku qornaa xaashida koowaad ee uu soo saaray. Guda-galkii hawshaasi, waxa ka dhashay kacaankii aqoonta oo saddex heer soo maray :-

1. Kii gogoldhigga ee shaqaalaha dawladda
2. Kii magaalooyinka
3. Kii miyiga.

Si markaas himilooyinkaasi loo fuliyo, lagama maarmaan ayey ku noqotay horseedayaashii kacaankii Hantiwadaagga ah, iney dib u habeeyaan waxbarashada guud ahaan. Sidaa daraadeed, waxa xoog weyn la saaray sidii xididdada loogu saari lahaa waxbarashadii gumaysiga cusub ee dib u dhigtay bulsha-weynta Soomaaliyeed, looguna beddeli lahaa mid la socota isbeddalka kacaameed.

Haddaan ku xisaabtanno maal-gelinta dugsiyada, machadyada iyo Jaamacadaha, waxa cad inuu kacaanku ugu talagalay si gaar ah hirgelinta ujeeddadaasi. Qorshihii hore ee kacaanku sameeyey 1971 - 1973 waxaa loogu tala galay in loo gogol xaaro sidii waxbarashada loo xoreyn lahaa, loogu na baahin lahaa miyi iyo magaalaba, iyadoo la beddelay manhajkii waxbarashada si looga dhigo mid waafaqsan daqanka, dhaqaalaha, iyo siyaasadda bulshada Soomaaliyeed.

Shaxdan hoos ku qorani waxay na tusaysaa sida ay tacliintu u korodhay.

| Sannadkii | 1969 | 1976 | koritaanka% |
|---|---|---|---|
| Dugsiyada Hoose | 231 | 844 | 265% |
| Dugsiyada Sare | 26 | 39 | 50% |
| Fasallada | 1.431 | 5.368 | 275% |
| Macallimiinta | 1.873 | 6.824 | 264% |
| Ardayda | 55.023 | 226.563 | 311% |

Xagga tirada Fasallada la dhisay, waxaan shaxda ku jirin kuwii iskaa wax u qabso lagu dhisay oo gaaraya 2.777 fasal, koritaanka fasalladu markaa wuxuu noqonayaa 469%.

Miisaaniyadda horumarinta waxbarashadu sidoo kale ayey aad ugu korodhay. Ugu yaraan sannad walba 25% ayaa kor loo dhigayey miisaaniyadda horumarinta marka laga soo bilaabo dhalashadii kacaanka. Haddii laysu geeyo maal-gelinta horumarinta waxbarashada gashay, waxay gaaraysaa So. Shs. 140 milyan, shaxda hoos ku qoran ayaana muujinaysa intii dawladda ka gashay.

| Sannadkii | 1971-72 | 1973 | 1974 | 1975 | 1976 |
|---|---|---|---|---|---|
| Miisaaniyadda caadiga ah | | | | | |
| Milyan Sh. | 26.3 | 38.7 | 51.7 | 78.3 | 97.9 |
| Miisaaniyadda Horumarinta | | | | | |
| Milyan Sh. | 6.2 | 22.8 | 29.3 | 15.0 | 26.8 |

Waxa lama huraan ah inaan halkan ku xusno Ololayaashii isdaba joogga ahaa sida OHRM ee qaybta laxaadka leh ka qaatay hirgelinta himilooyinka dadweynaha ee xagga baahinta waxbarashada.

Ma ahayn in OHRM himilooyinkiisu ku ekaayeen tirtiridda wax akhris iyo wax qorid la'aanta oo keli ah, ee wuxuu saameeyey barbaarinta iyo daryeelidda caafimdka dadka, daryeelidda xoolaha iyo tiro koobka xoolaha iyo dadka. Taasi waxay tilmaamaysaa dhismo bulsho iyo horukac degdeg ah oo wax wada qabashadu sal u tahay. Si loo fuliyo dhismaha dalka dhinac kastaba, baridda qoraalka iyo akhriska ee reer miyigu waxay awood inoo siisay in aynnu isla markaasi fulinno kacaan dhaqan iyo micnaha dhabta ah ee iskaa wax u qabso. Ololahaas HRM waxa wax ku bartay dad gaaraya 1.750.000 oo qof. Guud ahaanna waxbarashadu waxay gaadhay 1.990.500 oo arday.

## WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

Xagga Hiddaha iyo Tacliinta sare haddaan u gudubno, waxaan shaki ku jirin in isbeddal weyni ku dhacay intii kacaanku dhashay. Siyaasadda kacaanku waxay tahay in dhaqankeenna laga dhigo mid lugihiisa isku taaga. Muuqaalkiisa gaar ahna yeesha, iskorin kara, astaan hantiwadaageedna leh, lana kori kara cilmiga dabeecadda (N/Scince) iyo farsamada cusub. Si siyaasaddaasi lagu hirgeliyo kacaanku wuxuu abuuray hay'ado aqoon sare oo qalabkoodu u dhan yahay sida:-

1. Abuurista Jaamicadda Ummadda
2. Akademiyada Dhaqanka
3. Xoojinta Golaha Murtida iyo Maaweelada
4. Miyuusiyamka Ummadda
5. Abuurista Rugta Kutubta.

Hay'adahaasi waxay dhammaantood yihiin tallaabooyin u jeeda hirgelinta siyaasadda kacaanka ee Tacliinta sare.

## JAAMICADDA UMMADDA

Jaamicadda Ummaddu waxay maanta ka kooban tahay sagaal (9) kulliyadood oo kala ah:-


Sharciga, Dhaqaalaha, Waxbarashada, Beeraha, Kiimikada, Injiyeeriya, Xannaanada Xoolaha, Caafimaadka iyo Joolajiyada.


Miisaaniyadda Jaamacaddu waxay gaartay 1976kii 14.366.000 oo Shilin. Kulliyadda Waxbarashada ee Jaamicadda waxa kale oo tacliin gaarsiisan heerka sare ka qaatay macallimiin gaarta 1.500 oo macallin, haddana waxa ku jira 1.500 oo macallin. Waxa intaas raaca inay hadda tababar macallinimo oo heer sare ah ay ugu jiraan Dugsiga Xalane 3.500 oo macallin.


Waxa hoos ku qoran shax kuu qeyaxaysa kulliyadaha Jaamicadda Ummadda.

| Kulliyadda | Ardayda | Inta qalin jabisay |
|---|---|---|
| Sharciga | 366 | 99 |
| Dhaqaalaha | 396 | 77 |
| Waxbarashada | 713 | 572 |
| Beeraha | 153 | 21 |
| Kiimikada | 71 | 12 |
| Injiyeeriya | 116 | — |
| X. Xoolaha | 135 | — |
| Caafimaadka | 220 | — |
| Joolajiya | 58 | — |
| | 2.228 | 781 |









# Caafimaadka Dadka

Nafta aadamigu waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu qaalisan, haddii caafimaad ama fayoobi la waayo ha ahaato mid maskaxeed ama mid jireedba e qofku wax uu ku tooran yahay ma jirto. Sidaasuu daryeelka caafimaadku u yahay haw laha ugu muhiimsan bulshada maamulkeeda.

Waqtigii Isticmaarka iyo dawladihii kacaanka ka horreeyeyba, wuxuu daryeelka caafimaadku ku koobnaa magaalooyinka waaweyn oo qudha, halkaasoo ay degganaayeen dadka xukunka iyo maamulka hayaa.

Ahmiyad la siin jiray caafimaadka guud ahaan haba yaraatee ma jirin, daaweynta qofka bukaana waxay ku xirnayd hadba heerka dhaqaalihiisu joogo. Ayada oo ay dhibaatooyinkaasi waddanka ka taagnaayeen, ayaa waxaa dhashay kacaankii loo riyaaqay 21kii Oktoobar 1969kii, kaasoo mabda'iisu ahaa la dagaallanka saddexda (3) cadow ee bani'aadanka (Gaajada, Cudurka, iyo Jahliga). Isla markaa waxa lagu dhaqaaqay in si ku dhisan caddaalad iyo sinnaan loo habeeyo daryeelka caafimaadka Ummadda, iyadoo aaney taasi ku xirnayn wax shuruud ah. Sida runta ah waa in ahmiyad weyn la siiyaa ka hortagidda cudurrada, intii la sugi lahaa qofku marka uu bukoodo iyadoo, fiiro loo yeelanaayo dadka intiisa badan.

Sidaa darteed daaweynta qudheeda waxa loogu tala galay mashaariic kor loogu qaadayo Hantiwadaageynta, fidinta iyo maamulka caafimaadka.

Tallaabadii ugu horreysay waxay ahayd kharash la'aan laga dhigay baarista caafimaadka qofka, xagga takhtarka, shaybaarka, Fallaarta (X-ray), iyo seexashada cusbitaallada. Kacaanka ka hor hawshaasi oo dhammi waxay ahayd lacag, taasina micnaheedu waxa weeye dadku uma sinnayn daryeelka caafimaadka, ninkii lacag lihina wuu heli jiray caafimaad, kii aan lacag lahaynisa ma heli jirin.

1969kii miisaaniyaddii caadiga ahayd ee loogu talagalay maamulka caafimaadku waxay ahayd 23.803.189 shilin



sannadkii 1976kii waxay gaartay 40.738.070 shilin halkaasoo ay kor u kacday 71%. Kacaanka ka hor daawada waxaa laga heli jiray magaalooyinka Xamar iyo Hargeysa, maantana waxa Gobol kasta ku yaal bakhaarro dawladdu leedahay oo lagu kaydiyo daawooyinka. Degmooyinka intooda badanina waxay leeyihiin Farmashiiyayaal ay dawladda Hoose leedahay, kasokow kuwa iskaashatooyinka.

Waxa aad iyo aad loo xoojiyey ka hortagga cudurrada faafa, tusaale ahaan waxa laga tallaalay ama laga daaweeyey cudurradaasi:-

| Cudurka | Sannadkii 1969 | Sannadkii 1975 |
|---|---|---|
| Caaxada | Dadka 87.756 | Dadka 715.195 |
| Furuqa | 100.000 | 3.500.000 |
| Duumada | 191.014 | 251.312 |

Dhammaan Gobollada iyo Degmooyinka intooda badan waxa la geeyey ciidan caafimaad oo mid walba dhakhtar Jaamici ihi hoggaaminayo.

Tirada Takhaatiirtu 1969kii waxay ahayd konton iyo sagaal (59) 1969kiina waxay noqdeen boqol iyo afartan (140).

Sagaalkii sannadood ee kacaanka ka horreeyey ardayda Dugsiyada caafimaadka ka soo baxday waxay noqdeen 140, lixdii sano ee kacaankana waxay gaareen 471 arday. Waxa la dhisay soddon iyo toddoba (37) cusbitaal, waxaana kale oo jirta in kacaanku habeeyey soo dejintii iyo qaybintii daawooyinka.

Dhinaca badbaadada shaqaalaha, waxaa dib loo habeeyey sharcigii badbaadada shaqaalaha, hawshii Wakaaladda Badbaadada Shaqaalahana waa la fidiyey.







# WARSHADEYNTA

Warshadayntu sida runta tahay kuma koobna oo keliya warshadaha, hase yeeshee waxay si toos ah wax ugu tartaa dhinaca beeraha, xoolaha, kalluunka, macdanta iyo meelaha kale ee wax laga soo saaro ama laga qabanqaabiyo tacabka wax soo saarka. Waxaa kaloo jirta in warshadeyntu ay kaalin wacan ka geysato kordhinta aqoonta xoogsatada iyo kasmada siyaasadeed. Haddii aan dib ugu soo laabanno dalkeenna, sida la ogsoon yahay ma jirin wax warshadayn ahi intii ka horreysay curashadii kacaanka Hantiwadaagga ah ee nasiib wanaagga innoogu dhashay 21kii Oktoobar 1969kii oo ay ummadda Soomaaliyeed si aad iyo aad ah ugu riyaaqday.

Haddii aan fiiro gaar ah u yeelanno waxaan arki karnaa in waddankeennu muddo dheer ku jiray gacan gumaysi, ummadda Soomaaliyeedna ay dhibaatooyin fara badan ka soo martey talisyadii dibusocodka, iyo kuwii gumaysiga marka laga eego xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo aqoontaba. Hase yeeshee, ummadda Soomaaliyeed ma noqon mid ku waarta gacanta gumaysiga. Maxaa yeelay waxay la gashay halgan si ay dalkeeda uga xorayso gumaysiga, welina waxay ugu jirtaa halgan si looga ciribtiro gumaysiga adduunka oo dhan.

Haddaba intii dawladda tawriga ahi ay heysay maamulka waxa dalka loo sameeyey qorshayn si loo dhiso dhaqaale habaysan, waxaana la abuuray wasaarad u gaar ah warshadaha taasoo caddeynaysa in kacaanku siinayo fiiro gaar ah horumarinta warshadaha dalka.

Xilka inna wada saaran baa ah, inaan dalka saboolnimada iyo danbaynta ka saarnno. Sidaa awgeed, Kacaankii Oktoobar oo u dhashay badbaadinta iyo danaha ummadda Soomaaliyeed, wuxuu ugu baaqay warshadeynta iyo dhaqaalaha dalka oo dhan siyaasad cad, wuxuuna u dejiyey qorsheyn

cilmiyeed oo la raaco, isagoo u danaynaya xoogsatada dhisayana dhaqaale laf-dhabartiisu noqoto waxa-ka soo baxa warshadaha.

Taasi macnaheedu waxa weeye in la dhiso saldhiggii sancada Hantiwadaagga ah ee ummadda Soomaaliyeed ku istaagi lahayd oo ah warshado ummaddu leedahay iyo in la dhiso warshado dawladdu leedahay iyadoo la daryeelayo danta guud. Sidaasna waxaa ku hirgalay warshado fara badan oo waxtar weyn u yeeshay dhismaha dhaqaalaha, kaalin weynna ka galey horumarka dalka.

Iyadoo ay warshaduhu yihiin horumarka iyo dhalanrogga, ayuu kacaanku tallaabooyin xoog leh ka qaaday sidii degdeg arrintaa looga qaban lahaa. Kacaanka ka hor warshadihii jiray dalka waxay ahaayeen 13, oo 4 dawladdu lahayd, waxayna u badnaayeen kuwa yaryar oo qiimo sidaa u sii ridan aan ku fadhiyin.

Warshadahaasi dhammaantood way curyaansanaayeen, wax soo saarkooduna aad ayuu u yaraa, ilaa xad la oran karo magac ahaan ayuun bay jireen. Taa waxa caddaynaysa lacagta uu kacaanku geliyey si warshadahaasi loo kiciyo oo gaaraysa So. Shs. 235 malyan.

Kacaanku intii uu jiray waxa la abaabulay dhismaha soddon iyo sagaal (39) warshadood oo cusub. Labaatan iyo afar (24) warshadahaasi ka mid ahi waa dhammaystirmeen.

Shan iyo tobanna (15) gacantaa lagu hayaa. Kuwa dhammaaday waxa ku baxday lacag dhan So. Shs. 2243 milyan, kuwa dhismahoodu socdana waxa ku baxaya So. Shs. 1.072.0 milyan.

Waxa iyana xusid leh lacagtii ku baxday in lagu nooleeyo warshadihii kacaanka ka hor jiray oo dhammayd So. Shs. 235 milyan in ay ka badantahay kharashkii labaatan iyo afarta (24) warshadood ee dhismahoodu dhammaaday, taasina waa mid caddeyneysa in warshadahaasi baaba' ku sugnaayeen. Lacagta faraha badan (1.0 Bilyan iyo dheeraad) ee 15ka warshadood ee gacanta lagu hayo ku baxaysaa,



waxay tilmaamaysaa in nooca warshaduhu isbeddalayaan oo aan bilawnay warshado cusub «sida ta sibidhka, tan saliidda sifaysa iwm». Guud ahaan lacagta gashay warshaduhu, waxay dhantahay So. Shs. 1.538.0 milyan.Waana maalgelinta ugu weyn ee kacaanku ka hirgeliyey xagga qeybta wax soo saarka (productive sector).

Taasi waxay inna tusaysaa in la galay heerkii ugu adkaa istiraatijiyada kacaanka ee xagga warshadeynta ama warshadaha culus, hase yeeshee ilaa hadda warshadeheennu waxay u badan yihiin kuwa la xiriira warshadeynta miraha beeraha, xoolaha iwm.

Sida lagu caddeeyey barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, dhinaca dhaqaalaha ayaa fiiro gaar ah loo yeeshay looguna tala galay qorsho cilmiyeed iyadoo la fulinaayo qorshaynta sancada ee loogu tala galay 1974 - 1978. Taasi waxay run ahaantii ku socotaa habkii iyo hannaankii loo qorsheeyey waxaana markhaati u ah sida habsamida ah ee uu u fulay qorshahaasi labadii sano ee aan ka soo gudubnay. Haddii aan dib ugu noqonno sannaddii qorshahaasi oo ah kii labaad ee kacaankeenna hantiwadaagga ahi uu dajiyey, waxaa lagu tala jiraa in warshadeynta dalka la geliyo lacag dhan 800 oo malyuun oo shilin, taasoo ka badan lacagihii loogu tala galay qorshayaashii hore ee warshadeynta 245% (Boqolkiiba).

Qorshahaasi loo dejiyey warshadeynta waxaa ka dhashay horumar degdeg ah, haddii aynnu u fiirsanno dhinaca warshadaha iyo xagga shaqaalaha warshadaha oo weliba si weyn u kordhay, taasoo keentay in tacabka wax-soo-saarku kobcayo tiro iyo tayaba.

Haddii aan dib u eegno sida uu u fuley qorshihii loogu tala galay warshadaha sannadkii 1974 - 1975, waxaan arki karnaa in sannadkii 74kii la fuliyey 66% sannadkii 1975kiina qorshihii loogu tala galay uu u fulay 90.4, taasoo runtii muujinaysa kartida iyo biseylka siyaasadeed ee uu gaaray sha-

qaalaha Soomaaliyeed, iyagoo fahamsan isla markaana fulinaya baaqii kacaanka oo ahaa in dalka la gaarsiiyo isku-fillaansho iyo dhaqaale madaxbannaan.

Waxaan shaki ku jirin hubaalna ah, in maalinba maalinta ka danbaysa ay xoogsatada Soomaaliyeed kordhineyso tacabka wax soo saarka si dhulku u gaaro horumar dhakhso ah.

1975kii, warshadaha dawladdu waxay noqdeen 25 warshadood, faraha shaqaalahooduna wuxuu gaaray ilaa 12.000 oo qof. 1969 - 1975, hantida la geliyey warshadaha waxa lagu qiyaasay 200.250 Malyuun Shs. So.

Inkastoo warshadaha waddanka lagu qiyaasay 288 war shadood oo ay ka shaqeeyaan 5 qof iyo wax ka badan tan ugu yar, misna waxaa habboon in la xuso 25 warshadood oo ay dawladdu leedahay, waayo iyagaa horkacaya warshadeynta xag kastaba haddii laga eego.

1973kii, dhammaan wixii ka soo baxay warshadaha 75.2‰ (Boqolkiiba) waxa soo saaray warshadaha dawladda, sidaas oo kale, 1975kii, wixii ka soo baxay warshadaha dawladdu waxay ahaayeen 81.3% (Boqolkiiba).

Warshadaha dawladda wax soo saarkoodu wuxuu ka badan yahay 2 jeer warshadaha ay dadku leeyihiin. 1975kii nooca (gruppo di industrie) warshadaha dadku wuxuu ahaa 16 nooc, kuwa ugu badanina waxay yihiin: -
Cuntada, Dharka, Dhismaha iyo Xoogga Korontada, Kabaha iyo Hargaha, Alwaaxda iwm.

Si loogu fidiyo warshadeynta waddanka oo idil, warshadaha cusub waxa loo qaybiyey waddanka oo dhan iyadoo la tixgelinayo:-

Helitaanka alaabta ceedhiin, suuqa gudaha iyo dibeddaba, xoogga korontada, isgaarsiinta, helitaanka shaqaalaha iyo dekadaha.



Waxaa in la xuso u baahan in warshadaha dhismahoodu socdo 65% laga hirgaliyey Xamar dibaddeeda. Si loo dhuuxo ahmiyadda warshadaha dawladda iyo sida wax soo saarkoodu isu beddeley, muddadii kacaanku maamulka hayey, waxa inna tusi kara arrinta hoos ku qoran:-

1970 - 1975, wax soo saarka warshadaha dawladdu wuxuu batay laba jeer, tartanka sannadkiibana wuxuu ahaa 16%:-

| | | |
|---|---|---|
| 1970 | qiimaha waxa la soo saaray wuxuu noqday | 178.1 malyan |
| 1973 | qiimaha waxa la soo saaray wuxuu noqday | 246.0 malyan |
| 1974 | qiimaha waxa la soo saaray wuxuu noqday | 305.0 malyan |
| 1975 | qiimaha waxa la soo saaray wuxuu noqday | 366.0 malyan |

Si loo fahmo horumarka iyo isbeddalka ballaaran ee warshadaha, aynnu tusaale u soo qaadanno 8 (siddeed) warshadood oo ay dawladdu leedahay si la isugu geeyo 1973 - 1975, Warshadahaas oo kala ah:-

1. Warshadda SNAI
2. » Dharka ee Balcad
3. » Hilibka ee Kismaayo
4. » Caanaha ee Muqdisho
5. » Kalluunka ee Laas-qoray
6. » ITOP ee habeynta Qudradda ee Afgooye
7. » INCAS ee Kartoonka iyo Caagga ee Jamaame
8. » Sigaarka & Tarraqa ee Muqdisho


Warshadaha dawladda oo tiradoodu gaartay 25 warsha-


dood, waxaan tusaale ahaan u soo qaadanaynaa siddeeddaa warshadood si loo fahmo isbeddalka wax soo saarka, shaqaalaha iwm, Maadaama ay yihiin warshadihii ay shaqaalahooda ka muuqatay firfircooni iyo hawlkarnimo, taasoo keentay inay ka muuqato kordhinta tacabka wax soo saarka sida shaxdan ama looxani ku tusaayo:-


| Warsh. | Wax-soo saarka 1973 | Wax-soo saarka 1974 | W. s. saarka 1975 |
|---|---|---|---|
| W. Sonk. | 347.043q | 330.625 | 306.089 |
| W. Dhar. | 7.258.000y | 8.394.000 | 5.567.000 |
| W. Hilibka | 3.127t | 4766 | 4.956 |
| W. Caan. | 3.230.386L | 3.980.000 | 2.664.555 |
| W. Kalluunka | 435T | ——— | ——— |
| W. Sig. & T. | ——— | ——— | 750.000 |
| W. ITOP | 1.22.21T | 496,76 | 944.71 |

Waxa wax kuu noqda maskaxda caafimaadka qabta iyo xoogga aan hagrasho lahayn niyadsami iyo fikrad wanaagsan, taasi ayaana kordhin karta dhaqaalaha dalka. «Markii war la helo ayaa talo la helaa-, kaddibna waxaa ka abuurma nolosha qiimaha weyn u leh ummadda Soomaaliyeed». Hadalkaa waxa yiri Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ahna Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ah ee Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, mar uu ka hadlayey kaalinta ay warshadeyntu kaga jirto horumarka dalka.









# MUUSKA

Moosku waa miraha ugu muhiimsan ee waddanka ka baxa. Haddii laga reebo Xoolaha, Moosku wuxuu ku jiraa derajada labaad ee wax dhoofinta waddanka, lagana helo lacagta adag ee faraha badan.

Mooska waxaa lagu beeraa agagaarka labada webi, Shabeelle iyo Jubba. Dhulkii lagu beeray Mooska sannadkii 1970kii oo ahaa 5.200 hek; Sannadkii 1973kii wuxuu noqday 7,000 hektaar, 1974na wuxuu gaaray 9,800 hektaar. Mooska badidiisa dibadda ayaa loo dhoofiyaa inyar oo u dhaxaysa 25 ilaa 35% ayaa loo daayaa quudashada waddanka gudihiisa.

Dhoofinta Mooska dhaawac weyn ayaa gaaray markii la xiray biyo-mareenka «SUWEYS» sannadkii 1967kii. Heer sare ayey gaartay dhoofinta Moosku sannadkii 1972kii oo la dhoofiyey 133.900 oo tan. laakiinse haddana hoos ayuu u dhacay sannadkiiu 1973kii, oo la dhoofiyey 11.900 oo tan, waxaana u sabab ahaa webiga biyihiisii oo yaraaday. Sannadkii 1968kii ka hor, suuqa Moosku wuxuu ahaa waddanka Talyaaniga, sannadkaa ka dibna waxaa lagu dadaalay sidii suuq kala duwan Mooska loogu heli lahaa khaas ahaan waddammada Bariga Dhexe.

Run ahaantii suuqyada Bariga Dhexe waxaa la ogaaday inay yihiin kuwo aad u wanaagsan, waxaana dhacday in boqolkiiba 35% oo ah dhoofinta Mooska sannadkii 1973kii loo diray suuqa Bariga Dhexe. Sababta ahmiyad loo siinayo suuqyada cusubi waxay tahay in suuqii Talyaaniga tartankiisu batay, ayada oo aanay jirin macaamul khaas ahaaneed, iyo kirada gaadiidka oo aad u sarraysa.

Suuqyada Bariga Dhexe aad ayaa loogu hanweyn yahay, sida haksamida ah ee ay kordhinta dhoofinta Mooska suuqyadaa loo dirana waxaa si tifaftiran u tusaaleynaya looxa soo socda:-



DHOOFINTA MOOSKA

| Sannadka | Talyaaniga % | B. Dhexe % | Kuwa kale | Wadar | Lacagta adag 000.000. So. W. | soo saa. |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1970 | 83.9 | 16.1 | — | 100.2 | 50 | 5.2 |
| 1971 | 73.4 | 24.6 | 2 | 103.3 | 45 | 5.5 |
| 1972 | 60.8 | 30.6 | 8.6 | 133.9 | 89 | 7.1 |
| 1973 | 64.8 | 35.2 | 0.2 | 111.9 | 75 | 7.0 |
| 1974 | 43.0 | 57.0 | — | 110.2 | 74 | 8.0 |
| 1975 | 45.1 | 54.9 | — | 81.6 | 47 | 8.2 |

Looxaa tilmaamay dhoofinta guud ahaan, waxaan ka arki karnaa in dhoofinta xagga Bariga Dhexe sannadkii 1970kii ay ahayd 16%, sannadkii 1974na ay gaartey 57%. Dhoofinta xagga suuqa Talyaaniga oo ahayd 83.9%, waxay noqotay 43% waxayna hoos u dhacday kala bar ow bar. Iib geynta Mooska waddanka waxaa mas'uul ka ah Wakaaladda Mooska Ummadda *(National Banana Board)* oo iibsata Moos-

ka lagu dejiyo labada dekadood ee Kismaayo iyo Marka. Labada dekadood waxay u dhawyihiin gobollada Shabeelle iyo Jubba oo lagu beero Mooska.

Xagga suuqa Talyaaniga, waxaa arrintaa iibsiga qaabbilsan Wakaaladda la yiraahdo *(Società Mercantile Oltremare)* (SMO). Qaayaha dhoofinta Moosku aad ayey kor ugu kacday, ha noqoto xagga Yurub ama Bariga Dhexe. Suuqa Talyaanigu wuxuu u baahan yahay qiyaas ah 10.000 oo tan oo Moos ah, baedamaa uu kharajka gaadiidku uu hoos u dhacay markii la furay biya mareenka «SUWEYS», kolkaasoo tartanka xagga dhoofinta Moosku uu gaaray heer sare. Weydiinta (demand) ballaaran ee xagga suuqyada Bariga Dhexe waa tilmaan kale oo loo bogi karo, mustaqbal wanaagsan u leh dhoofinta Mooska Soomaalida.

Ayada oo taasi ay jirto, dhoofinta Moosku sannadkii 1972kii kaddib, waxay muujisay hoos u dhac inkastoo khasaaraha xagga tirada *(losses in quantity)* qaarkood uu soo celiyey sicirka sare ee Mooska.

Isbarbardhigga sannaddada 1969 - 1975 xagga dhoofinta Mooska:-

| Sannad | Dhoofinta Guud oo Kiintaal ah |
|---|---|
| 1969 | 928.180 |
| 1970 | 1.028.444 |
| 1971 | 1.033.148 |
| 1972 | 1.339.345 |
| 1973 | 1.119.313 |
| 1974 | 1.022.987 |
| 1975 | ,15.480 |


Dhoofinta Moosku sannadkii 1975kii aad ayey hoos ugu




dhacday, sabatuna waxay ahayd abaarihii waddanka ku habsaday sannadkii 75kii dartood.

Dhoofinta guud ee sannadkii 1975kii waxay ahayd 815.480 Kiintaal, inta loo dhoofiyey Bariga Dhexe waxay ahayd 447.786 Kiintaal oo ah 54.9% haddii loo eego dhoofinta guud ee Mooska.

Wakaaladda Moosku waxay aad ugu dadaashay Mooska si loo badiyo dhoofintiisa, tallaabadaa ayada ahina waxay qayb libaax ka qaadan doontaa raalligelinta weydiinta Mooska oo sii kordhaysa ha noqoto waddammada Yurub ama kuwa Bariga Dhexe.





# CADDAALADDA IYO SHARCIGA

Xeerku wuxuu had iyo jeer ka tarjumaa dhaqaalaha iyo siyaasadda bulsho kastaba ku dhaqanto. Taariikhda marka la fiiriyo waxa inoo muuqanaysa in hab kasta oo dhaqaale uu leeyahay xeerar u gaar ah.

Nidaamka hantiwadaagga ahi wuxuu u horseedaa in qalabka wax soo saaridda iyo barwaaqada dalku ahaadaan, hanti dadweyne, taliska xukunka dalkuna ahaado mid danta dadweynaha u adeegaya, sharciyaduna ahaadaan kuwa daryeela danaha xoogsatada.

Kacaankeennii curtay 21kii Oktoobar, 1969kii, siduu ku muujiyey ballanqaadkii 1aad iyo kii 2aad, wuxuu dhisayaa bulsho cusub oo ku dhisan shaqo iyo caddaalad ijtimaaci ah, iyadoo la raacayo mabaadii'da toosan ee hantiwadaagga cilmiga ah.

Waa inaan qofna laga duudsiyin wixii kartidiisa iyo aqoontiisu u goyso, kana horjeeda isku dulnoolaadka ay wadaan imbiriyaaliyadda iyo dib-usocodka iyada ku xirani.

**Amniga Dalka:**

Dadka Soomaaliyeed waxay hantiyeen gobannimadooda kaddib markii ay halgan xalaal ah u soo mareen 26kii Juun iyo 1dii Juulay 1960kii, waxaana gashay yididiilo weyn oo saamaysa aayatiinkooda danbe. Waxay malaysanayeen nabadgelyo, horukac, tacliin iyo xushmad bani'aadam kuwaas oo aan hore u jiri jirin waqtigii isticmaarka, hamuumna ay u qabeen inay gaaraan.

Nasiib darro waxaa dhacday kuwii mas'uuliyadda loo dhiibay inay ka leexdeen dhabbihii toosnaa ee laga filayey.

Waxa yaxyax lahayd in mudanayaashii baarlamaanka ee laga eegayey hoggaaminta geeddiga cusub, ay kala raaceen



dawladahii ajnabiga ahaa, oo danjire kasta oo dalka joogayba uu yeeshay koox uu ku shaqaysto sidaas daraadeedna maamulkii u socday sidii waddammada cadawga inoo ihi ay doonayeen. Waxa dhacday inuu qofku sharciga ka weynaado, sharcigana loo fuliyo sida qofkaasi doonaayo haddii uu ku xiran yahay siyaasiyiintii waddanka, tallaabadaasina ay dhalisay in amnigii gacanta xukuumadda ka baxey, qof walibana uu ku talagalay inuu isagu is daafaco mar haddii sharcigii la xooray.

Taariikhda Ummadda Soomaaliyeed waxaa ugu xumaa sannadkii 1969kii. Sannadkaasi wuxuu caan ku ahaa: dhac, dil, boob, xatooyada xoolaha ummadda, awood sheegasho iyo qabyaalad. Wuxuu ahaa sannadkii kontarabaanka la xalaashaday, wuxuu ahaa sannadkii hub waddanka soo gala ugu badnaa si qof waliba naftiisa ku daafaco.

Waxaa la gaaray heer nabadgalyadii faraha ka baxday xornimadiina khatar gashay, taasaana keentay in dadkii wax garadka ahaa oo ciidammada qalabka sidaa ugu horreeyeen ay dhaliyeen tawraddii 21kii Oktoobar, 1969kii si xornimada waddanka loo nabadgaliyo.

Waxyaalihii kacaanku qabtay 1969-75kii, waxaa ka mid ahaa nabadgalyadii iyo xasiloonidii oo waddanka ku soo noqotay, dilkii iyo dhacii oo joogsaday, kontarabaankii iyo xatooyadii xoolaha ummadda oo yaraaday, iyo isjacayl iyo walaalnimo lagu abuuray ummadda Soomaaliyeed.

Si horumarkaasi lagu fahmo, waxaa wanaagsanaan lahayd in tirakoobkii danbiyada ee 9kii sanno ee kacaanka ka horraysay la dhinac dhigo 6dii sano ee kacaanku muumulka hayey, haseyeeshee nasiib darro ma jirin wax tiro koob ah oo la sameeyey 69kii ka hor, hase ahaatee waxaan halkan ku qoraynaa tira koobkii danbiyada 1969kii oo la barbardhigay 1974kii, si lagu arko isbeddalka xagga nabadgalyada ka dhacay.

Danbiyadii 1969kii waxay u badnaayeen dhac, dil, booli-qaran iyo wax la mid ah, laakiin 1974kii waxaa u badnaa tuugo yaryar, dhaawac fudud iyo waxyaalo la mid ah. Dunuubta

yaraatay iyo xasiloonida waxaa sabab u ah iyadoo waddanka loo sameeyey sharciyo waddani ah oo la socda dhaqanka, dhaqaalaha iyo heerka aqoonta dadka, iyo iyada oo aan la eegayn dabaqad, waji, ama derajo ee qofkii sharciga ku xad-gudba maxkamadda lala tiigsado.

Taasi waxay u sahashay shaqadii ciidammada amniga waddanka, iyaga oo awood u helay in ay waajibaadkooda gutaan cabsi la'aan iyo fara gelis la'aan.

Sannadkii 69kii waxaa dhacay 15.323 oo danbi, sannadkii 75kiina waxa dhacay 3.401 danbi.

Waxaa kaloo jirtay inay garsoorayaashu aad u yaraayeen. Sannadkii 69kii waxay ahaayeen 110, 1975kiina waxay gaareen 250 garsoore.

Sidoo kale Maxkamaduhu 1969kii waxay ahaayeen 70 Maxkamadood oo kaliya, 1975kiina waxay gaareen 124, waxaana u dheexeeya farqi ah 54 maxkamadood. Waxaa iyaduna xusid weyn leh Masaajiddada oo 1969kii ahaa 942, 1975kii waxay noqdeen 1173, waxaana u dhexeeya farqi ah 231 Masaajid.

Si bulshadu ay u noqoto mid ka caafimaad qabta dhinac kasta ayaa waxaa loo dejiyey xeerar ay ku dhaqanto ummaddu. Kacaanka ka hor waxaa dalka lagu xukumi jiray oo maxkamaduhu ay ku shaqayn jireen xeerar Ajnabi, kuwaasoo dhanna waa la Soomaaliyeeyey.

Xeerarkaa la dejiyey kuwa ugu waaweyn waxaa ka mid ah: Habka madaniga.

1) Xeerka Qoyska;
2) Xeerka Iskaashatada Qareenada;
3) Xeerarka Shaqaalaha;
4) Xeerka Shaqaalaha Dawladda;
5) Xeerka midaynta garsoorka;



6) Xeerka Iskaashatooyinka;
7) Xeerka Dhulka iyo lahaanshaha.

Dhammaantood xeerarkaas aan kor ku soo sheegnay waxay yihiin kuwo laga fiirsaday oo ay soo gorfeysay soona lafa gurtay Waaxda Xeer dejinta iyo talo ka bixintu. Tusaale ahaan haddaan u soo qaadanno «**Xeerka Qoyska**» oo soo baxay 1975kii, wuxuu si run ah u cabbirayaa falsafadda Kacaanka, maxaa yeelay wuxuu si xaq ah u simay gabadha iyo wiilka haddii laga eego xagga dhaxalka, nafaqada, korinta carruurta iyo shaqadaba.

# HAWEENKA SOOMAALIYEED

Ummadda Soomaaliyeed waxay xilligan kacaanka ah ku jirtaa halgan dheer oo garab iyo gaashaanba u baahan. Halgankaasi waxa weeye mid ujeeddadiisu tahay in hore loogu mariyo dhaqaalaha, dhaqanka, iyo nolosha ijtimaaciga ah ee ummadda Soomaaliyeed.

Gumeystayaashu dibudhac weyn ayey soo gaarsiiyeen Soomaaliya waxaaney u qaybiyeen waddanka shan meelood, mana jirin wax horumar ah oo la taaban karo oo dhaqaale oo ay sameeyeen intii ay xukumayeen. Iyada oo halganka ay ummadda Soomaaliyeed heeganka u tahay uu dheeryahay oo aanay fari ka qodnayn, loona baahan yahay midnimo, isku duubni iyo is garabsi si loo gaaro horumarka la higsanayo, bal aan is-tusaalaynno sida halgankaasi u noqonayo mid meel mar ah oo taabbagala, iyo arrimaha xoogagga saldhigga u ah.

Ummadda Soomaaliyeed oo tiradoodu aanay badnayni uma baahna in loo kala qaybiyo rag iyo dumar; waayo hadii taasi dhacdo halganka dheer ee loo guntaday waxa uu noqonayaa naafo. Bal hadda aan dhexgalno oon faaqidno doorka weyn ee dumarka Soomaaliyeed ay ka qaadan karayaan arrimaha saldhigga u ah hirgelinta halganka ummadda Soomaaliyeed heeganka u tahay.

Kacaanka Hantiwadaagga ah ee dalka ka curtay 1969kii, wuxuu olole ku qaaday kana dhaadhicinayey dadweynaha in dumarku ay yihiin xoog kaalin weyn kaga abbaaran horumarka dalka, oo la'aantood uu qabyo noqonayo. Tan iyo maalintaa kacaanku dhashayna waxa olole weyn lagu hayey in maskaxda dadweynaha laga baabi'iyo cadaadintii, niyad jabkii iyo caddaaladdarradii lagu hayey dumarka weligoodba oo sii xidideysatay waqtiyadii ay gumaystayaasha iyo dawladihii dabadhilifka u ahaayeen xukunka dalka.

Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu tirtiray fikraddii xumayd ee laga haystay haweenayda Soomaaliyeed, taasoo ahayd in aanay waxba qaban kar[illegible] . . . . . gurigoy joogto maahee, waxaanu xididdada u si[illegible]y xaqiraaddii iyo ka curyaamintii lagu hayey xagga waxbarashada iyo horumarka dumarka.



Markii uu kacaanku u soo celiyey xuquuqdoodii laga dulmay ayey soo shaac baxday oo la dhadhansaday waxqabadka haweenka.

Waxay haweenka Soomaaliyeed qayb libaax ka qaateen Ololayaashii isdabajoogga uga socday dalka guud ahaan. Dumarku waxay noqdeen xoogga kaliya ee urursan, isku-duuban, gartayna halka ay higsanayso ummadda Soomaaliyeed ee hayaanka ihi. Kacaanku wuxuu garansiiyey inay ula siman yihiin mujtamaca intiisa kale, doorka kaga aaddan dhismaha dalka dhinac kastaba, waayo waa ababiyeyaasha iyo koriyayaasha qoyska, qoyskana waxa ka dhasha bulsha weynta.

Firfircoonaanta iyo qiirada ay kaga qayb qaateen hawlaha adag ee dalka ka socda waxaa uga marag kacaya baraha ay dheeraysiiyeen intii ninku qaban jiray. Dumarka Soomaaliyeed waxay ku noqdeen leeb mariid leh oo ku taagan afmiishaarada iyo dib u socodka aan weli garan meesha loo hayaansan yahay.

**Halgankii gobannimo doonka:**

Haweenka Soomaaliyeed waxay door la yaab leh ka soo ciyaareen gobannimo doonkii loo wada xiiqsanaa, si loogu harraad baxo neecawda xorriyadda. Dumarku waxay si hagar la'aan ah ugu deeqeen gobannimodoonkii dalka maalkoodii, muruqoodii iyo waxa ugu qaalisan wax bani'aadmi huro oo ah naftiisa. Dumarka Soomaaliyeed bay ahaayeen kuwii u gilgishay, iyadoo ay taariikhdu uga marag kacayso halgankii ay la soo galeen dulmiga, cadaadiska iyo isticmaarka.


Inkastoo ay dawladihii gumaystaha u adeegi jiray lumiyeen oy dayaceen, daahna ay saareen kaalintii halganka haweenka, waxa sharaftii laga xayuubiyey dib ugu soo celiyey kacaankii dalka ka curtay 21kii Oktoobar, 1969kii. Kacaanku wuxuu ku maamuusay halgankii haweenka Soomaaliyeed taallooyin lagu xusuusto oo maanta kaaha iyo dhallinta

yaryar ee Soomaaliyeed ay xirmooyin ubax ah dul dhigaan.


Xoghayaha Guud ee Xisbiga H. K. S. Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo ka hadlayey tilmaamayeyna kaalinta haweenka waxa uu yiri: «Haweenku waa xoog uusan garan karin qofka maan gaabka ahi».











# KALLUUMEYSIGA

Sida la ogsoon yahay kalluumaysigu kama horrayn markuu kacaanka Hantiwadaagga ahi uu abuuray Wasaarad u gaar ah horumarinta kalluunka iyo gaadiidka badda si loo muujiyo ahmiyadda khayraadka badda, si buuxdana looga faa'iidaysto. Dawladda kacaanku xagga ka faa'iidaysiga badda tallaabo lixaad leh ayay ka qaadday waxayna xoog saartay abuurista iyo hagaajinta gaadiidka badda, dekadaha iyo warshadaynta badda, kuwaasoo dhammaan tilmaamaya sida qiimaha leh ee waaxdan kacaanku wax uga qabtay.

Sida laga warqabo Soomaaliya waxay ku taallaa Xeebta ugu dheer Afrika oo idil marka laga saaro Konfur (South) Afrika. Dheeraantoo keliya micnaheedu ma aha ee waxay tahay in baddeennu ay ku caan tahay noocyo fara badan oo kalluunka ugu qaalisan sida: Toonaha, Tamadida iwm. Waxa waxaas oo khayraad ah kacaanka ka hor ka munaafacaadsan jiray dad shisheeya ah, iyadoo haba yaraatee wax faa'iido ahi aanay waddanka dib ugu soo noqon jirin. Taasina waxaa shadaafta loo laabay curashadii kacaanka samawade oo ay ujeeddooyinkiisu ahaayeen in la daryeelo danaha dadweynaha dalkana la gaarsiiyo dhaqaale madaxbannaan. Sidaa awgeed waxa markiiba la curiyey iskaashatooyin kalluumaysato, kuwaasoo gacan buuxda lagu siiyey hawlahoodii sida qalabka wax lagu soo saaro iyo gaadiidka. Kharajka guud ee Iskaashatooyinkaa uu kacaanku ku dhiirigaliyey wuxuu gaarey lacag dhan So. Sh. 10.000.000, taasaana kuu caddeynaysa ahmiyadda uu kacaanku ka leeyahay horumarinta kalluumaysiga, waxaa iyana ku darsamay lana degay beelihii dan wadaagta ahaa ee kalluumaysatada Baraawe, Cadale iyo Bedey oo goor aan dheerayn isu bedelli doona kalluumaysato heer sare ah. Saddexdaas beelood oo haatan si wanaagsan isugu dubbadhacay ayaa la filayaa inay noqdaan hormoodyada beelaha kalluumaysatada Soomaaliya.

Haddii aan u soo laabanno xeebta dalkeenna waxaan ogsoonnahay in dhererkeedu gaarayo 3.000 Km., kalluunka

laga qaban karo sannadkiiba waxaa lagu qiyaasay in ku dhaw 750.000 ilaa 2,000,000 oo tan. Kalluunku waa cunto nafaqeysan oy ka buuxaan waxyaaba fara badan oo jirka bani'aadanku u baahan yahay.


Waxaa hubaal ah in kalluumaysigu haddii si wanaagsan uu u hirgalo aan ka heli karno cuntada aan u baahannahay marka koowaad, marka labaadna lacagta adag ee dalku baahida u qabo, iyadoo suuqa kalluunka ee dibaddu uu aad u fiican yahay sababta oo ah tirada dadka adduunka oo si laxaad leh u kordheysa.

Si himilooyinkaasi loo fuliyo, waxaa la geliyey maalgelin gaaraysa 72.10 milyan oo shilin. Maalgelintaasi waxaa ka mid ah doonyo matoorro leh, oo kaalin weyn ka qaadan kara tacab kordhinta iyo wax soo saarka khayraadka faraha badan ee badda jiifa, waxaaney taasi ahayd tallaabo qiimo weyn u leh xagga qalabeynta kalluumaysatada. Sidaas oo kale, waxaa la gaday qaboojiyaal waxtar u leh keydinta kalluunka.

Tallaabooyinka lagu kordhinaayo kalluunka la qabto waxa ka mid ah in kalluunka la soo jillaabo la gaarsiiyo 125.000 oo tan, halkii markii hore uu ka ahaa 5000 oo tan. Haddii aannu u leexanno dhinaca dhoofinta, kalluunka la dhoofiyaa si lixaad leh ayuu u kordhay. Marka laga billaabo sannadkii 1969kii, kalluunka la qasaceeyey wuxuu kor u kacay 26% sannadkii 1973kii ka dibna wuxuu muujiyey korodhsiimo joogto ah isagoo maalinba maalinta ka danbaysa sii badanaya. Farsamada iyo Tiknoolojiyada casriga ah ayaa lagu habeeyey hawlaha kalluumaysiga.

Xagga qorshaha ku saabsan horumarinta kalluumaysiga dalka, qorshaha shanta sano ee 1974-78ka, waxaa si xoog leh loo fidiyey heerka dhaqaalaha ee kalluumaysiga iyadoo loogu tala galay miisaaniyad lacageed oo dhan So. Sh. 106. malyuun oo wax lagaga qabandoono 12 mashruuc oo gaar u ah horumarinta kalluumaysiga.





# GANACSIGA

Intii kacaanka ka horraysay ganacsiga ummadda Soomaaliyeed wuxuu ahaa mid in yar oo kaliya ay ka faa'iidaysan jireen, badina wuxuu gacanta ugu jiray dad shisheeye ah oo aan daryeelaynin danaha dadweynaha, iyagoo ku dadaalayey in ay dalka ka abuuraan dad Hantigoosad ah.

21kii Oktoobar 1969kii, waxa nasiib wanaag noqotay in dalka uu ka dhashay kacaan Hantiwadaag ah oo ujeeddooyinkiisu ahaayeen in la daryeelo danaha dadweynaha. Kacaanka Hantiwadaagga ahi durbadiiba wuxuu qaaday tallaabooyin cad cad kuna habaysan qorshayn cilmiyeed, si dalka iyo ummadda Soomaaliyeed looga nabadgaliyo Hantigoosad iyo isku dul noolaasho.

Dawladda Tawriga ahi waxay si habsami ah ganacsiga ugu habaysay mabda'a toosan ee Hawl iyo Hantiwadaagga ah, iyadoo la tixgelinayo in ganacsigu uu yahay halbawlayaasha ugu waaweyn dhaqaalaha dalka.

Tallaabooyinka ugu waaweyn ee la taaban karo kuna saabsan si loo fuliyo himilooyinka ummadda Soomaaliyeed, waxaa loo qorsheeyey ganacsiga si loogu dhiirrigeliyo tacab kordhinta xagga beeraha, warshadaha iyo farshaxanka iyadoo lala kaashanayo khayraadka dhulkeennu hodanka uu ku yahay.

Dawladda Tawriga ahi iyadoo daryeelaysa danaha Ummadda Soomaaliyeed waxa waajib noqotay in tallaabo tallaabo loo toleeyo xubnaha Ganacsiga, taasoo markii ugu horraysay laga billaabay Bankiyada oo ganacsiga halbowle u ah.

Markii labaad waxa lala wareegay waxyaabihii taabanayey danaha dadweynaha oo ay ka mid ahaayeen cuntada, alaabta dhismaha, daawooyinka, soo dejinta iyo qaybinta batroolka, dhoofinta Hargaha iyo saamaha, dhoofinta xabagta iyo muuska. Sidaas oo kale ayaa waxa la toleeyey soo dejinta dharka, alaabta maacuunka, baabuurta iyo Makiinadaha. Wasaaradda Ganacsiga waxaa hoos yimaadda Wakaaladaha ganacsi sida: Wakaaladda Ganacsiga Ummadda, Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha, Wakaaladda dharka iyo Maacuunka, Wakaaladda Batroolka Soomaaliyeed, Wakaaladda Batroolka Ummadda, Wakaaladda Horumarinta Xoolaha, Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Wakaaladda Ganacsiga Badarka iyo Wakaaladda Rugta Ganacsiga.

Waxaa maanta Wasaaradda Ganacsiga faan u ah in la toleeyey alaabta soo degta oo dhan, alaabta dhooftana inteeda badan ay gacanta ku hayaan Wakaaladaha Dawladdu.

Tolaynta Ganacsiga waxaa lagu horseedayaa danaha dhaqaalaha, ee saldhigga u ah mabaadii'da Hantiwadaagga cilmiga ah. Sidaa awgeed waxaan oran karnaa tolaynta Ganacsigu waa hooyada «Hantiwadaagga», Wasaaradda Ganacsiga waxaan ku tilmaami karnaa hubka lagu hirgelinayo mabaadiida toosan ee xalaasha ah. Markii kacaanku uu dhashay 21kii Oktoobar, sida aan soo sheegnay, ganacsigu wuxuu ahaa mid ku habaysan danaha gumaysiga iyo dib u socodka.

Si looga gaashaanto dhibaatada dhaqaalaha, Wasaaraddu waxay si isdabajoog ah u qaadday tallaabooyin la taaban karo oo ay ka mid ahaayeen in ay oodday daldaloolkii ganacsiga dibadda si loo xoojiyo ilaalinta lacagta adag. Iyadoo la tixgelinayo taasi waxa tallaabooyin habboon laga qaaday xoojinta iyo ballaarinta sayladaba aynnu wax u iib geynno. Waxaa la darsay kordhinta alaabta aynnu dibadda u dhoofinno, si aan dhaqaalaheennu ugu xirnaan shay ama laba.

Waxa kaloo la joojiyey xiriirkeenna ganacsiga ee dibadda taasoy door weyn ka ciyaartay Wasaaraddu guul weynna ay ka gaartay.

Wasaaradda Gancsiga iyo Wakaaladaha la xiriiraa kaalin weyn ayey ka qaateen xoojinta iyo horumarinta dhaqaalaha dalka, iyadoo maalinba maalinta ka danbaysa kordhineysa tacabka, isla markaana dhiirigelinaya hay'adaha ama dadweynaha wax soo saara si dalku uga gaaro isku filaasho dhinac kastaba.

# XOOLAHA

Xooluhu waa lafdhabarka dhaqaalaha waddanka. Dadka Soomaaliyeed 70% ayaa ku nool xoolaha iyo wixii ka yimaaddа Xoolaha. Waxa kale oo intaa dheer 70% lacagta adag ee aan dibadda ka helno Xoolaha ayey ka yimaadaan. Xoolaha dhaqashadoodu waa mid Soomaalidu hidda iyo dhaqan u leedahay reer guuraanimadana waxa keenay cimilada waddanka ee qallafsan — Roob yaraanta, daaqsiinta oo xun, iyo biyaha ceelasha oo aad u yar, taasoo ka dhigtay reer guuraanimada nolosha qura ee ku habboon dadka xoolo dhaqatada ah. Waxaa lagu qiyaasay in 55% dhulku ku habboon yahay daaqsiinta, hase yeeshee abaaro badanaaba dhaca ayaa ku qasba Xoolaleyda inay ka guuraan meesha abaartu ku dhacdo una hayaamaan hadba meesha baad iyo biyo leh.

Dhab ahaan iyadoo dhibaatadaasi had iyo gooraale taagnayd, haddana Xooluhu qayb libaax ayey kaga jireen dhaqaalaha waddanka.

Ilaa haatanna xooluhu waa qaybta dhaqaalaha ee ugu fudud xoogeyntiisa. Sidaa awgeed ayey lagama maarmaan u tahay in darajada koowaad la siiyo marka dhaqaalaha waddanka la qorshaynayo.

Dadka Soomaaliyeed waaya-aragnimo dheer ayey u leeyihiin Xoolaha dhaqashadooda. Xoolaha waddanku aad ayey u koreen, waxaana ugu wacnaa.

1) Xannaanada Xoolaha oo ballaaratay.
2) Wara badan oo la sameeyey biyo badanna lagu kaydin karo muddo dheer.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya aad ayey ugu dadaashay la dagaallanka cudurrada Xoolaha, haatanna dabargoynta dabakaruubka ayaan hoos ku xuseynaa.

| | Woqooyi | Koonfur | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Lo' | 0.5 | 2.5 | 3.0 |
| Ido iyo Riyo | 11.0 | 3.0 | 14.0 |
| Geel | 1.3 | 1.2 | 2.5 |



Dadka aqoonta dheeraadka ah u leh Xooluhu waxay caddeeyeen in Xooluhu heerkoodii hore ay ku soo noqon dooaan shan sano ka dib, inkastoy abaartii dhibaatooyin xoog leh u geysatay. Sida ka muuqata looxa kor ku qoran 11 malyuun oo ari ah ayaa ku nool Gobollada Woqooyiga. Gobollada koonfureed waxaa ku nool 2.5 malyuun oo lo' ah. Taasina waxay wax ka sheegaysaa sida xooluhu waddanka ugu qaybsan yihiin. Ariga ayaa ku badan gobollada Woqooyi, lo'duna waxay ku badan tahay Gobollada Koonfureed. Geelu wuu u qaybsan yahay gobollada.

Horumarinta Xoolaha, reer guuraannimada ayaa hortaagan, dhibaatooyinka la xiriira reer guuraannimadana waxa u dheer cimilada waddanka oo aad wax u sii yeeshay baadiyaha. Abaaraha oo badan, biyaha oo yar, daaqsiinka oo xun, maamulka Xoolaha oo aan cilmi ku dhisnayn iyo Xoolaha oo si lixaad leh loo iib geeyey ayaa si run ah u dhaawacday xoolaha dalka. Waxa aad u adkaatay in maamul fiican oo cilmi ku dhisan lagu dhaqo xoolaha waddanka, sababta oo ah dad hadba meel u guuraya qorsha wacan oo meel marah lagu-ma samayn karo. Sidaa awgeed ayaa mar waliba uu u xumaa maamulka xooluhu.

Taasi maaha micnaheedu in la daayacay ama la illaabay xannaanada xoolaha waddanka, waxayse muujinaysaa in tallaabooyinka la qaaday ay ka hooseeyaan kuwii habboonaa, sababta oo ah mid farsamo iyo mid lacageedba. Ahmiyadda iyo qaayaha xooluhu waddanka u leeyihiin marna shaki ma gelin.

Waddanka haddii si dhab ah la doonayo in wax looga qabto, waxaa lagama maarmaan ah in si wacan looga faa'iidaysto xoolaha, taasina waxay qasab ka dhigaysaa in lala dagaallamo reer guuraannimada, lana dejiyo dadka. Dhaqaale ku dhisan reer guuraannimo ma-noqon karo dhaqaale dhisan oo qorshaysan.

Nolosha reer guuraannimadu ma aha mid rasmi ah, waana mid khatar weyni ku jirto oo adkeynaysa in lala dagaallamo dabeecadda. Markii Kacaanka barakaysani ka curtay waddanka ayaa la qorsheeyey tallaabooyinka soo socda:

1) In la joojiyo lana baabi'iyo cudurrada xoolaha ku dhaca.


2) In kor loo qaado xannaanada xoolaha.
3) In lala dagaallamo dhibaatooyinka dabeecadda.

Si loo hirgeliyo himilooyinka kor ku xusan, waxa la abuuray Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa, waxaana loo xilsaaray inay si buuxda u daryeesho Xoolaha wadadanka wanaaggooda iyo tarankoodaba. Miisaaniyadda badan oo sannad walba sii kordhaysa ee la siiyo Wasaaradda, waxay calaamo u tahay ahmiyadda weyn ee kacaanku siinayo daryeelka xoolaha. Tusaale waxaa arrintaa u ah marka aan fiirinno Miisaaniyadda Wasaaradda ee sannadkii 1969kii oo loogu talagalay hagaajinta xoolaha, waxay dhammeyd Shs. So. 8.443.230, waxaana la siiyey sannadkii 1974kii lacag dhan Shs. So. 13.860.549, taasina waa horukac 64%. Mudadaa gaaban ee Miisaaniyadda Wasaaraddu 64% kor ugu kacday ayaa caddeynaysa ahmiyadda weyn ee kacaanku siinayo xoolaha oo ilaa iyo haatan 70% yihiin xoolo marka laga eego waxyaalaha aan dibadda u dhoofinno.

Looxa hoos ka muuqda ayaa muujinaya heerka lacagta adag ee aan ka helno Xoolaha dalkeenna laga dhoofiyo.

| Sannadka | Waxa la dhoofiyey | Qaybta Xoolaha | Boqolkiiba |
|---|---|---|---|
| 1969 | 231.910.385 | 132.014.345 | 56% |
| 1970 | 224.346.177 | 119.268.291 | 53% |
| 1971 | 246.440.901 | 123.276.201 | 50% |
| 1972 | 298.444.671 | 160.533.945 | 53% |
| 1973 | 340.418.940 | 196.674.176 | 57% |
| 1974 | 390.566.756 | 222.394.167 | 56% |
| 1975 | 563.300.000 | 335.900.000 | 60% |





# CUDURRADA XOOLAHA

Iyadoo la aqoonsan yahay qiimaha Xooluhu u leeyihiin dhaqaalaha waddanka ayey Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqu si buuxda isugu xilqaantay ilaalinta Caafimaadka Xoolaha, waxayna Wasaaraddu qorshaysay tallaabooyin meel mar ah oo lagu daryeelayo Caafimaadka Xoolaha. Waxaana ka mid ahaa kuwaan:

1) In la abuuray qayb wasaaradda ka mid ah oo loo xilsaaray qaybinta iyo soo dejinta daawada.
2) In la abuuray machad lagu sameeyo daawada.
3) Miisaaniyad culus oo la siiyo qaybta daawada.
4) In la abuuray Laanta Xannaanada Xoolaha ee Jaamacadda Ummadda si loo helo takhtar xooleed.
5) In la abuuray machad lagu tababaro Kalkaaliyayaasha xannaanada xoolaha.

Guud ahaan markii tallaabooyinkaa la qaaday caafimaadka Xooluhu aad ayuu u kordhay, cudurka daba karuubka oo ahaa cadowga koowaad ee Xoolaha, waxa waddanka lagaga ciribtiray barnaamijkii loo yaqaannay **«Ololaha ciribtirka dabakaruubka»**. Waxaa qasab laga dhigay tallaalka lo'da, tallaalkii oodda lagaga qaaday xooluhuna aad ayuu u dhimay cudurradii xoolaha ku dhici jiray. Xoolaha oo la daaweeyo iyo iyaga oo la tallaalo inta cudurku aanu ku dhicin ayaa lagu badbaadiyey Xoolaha waddanka korna u qaaday wax soo saarkooda. Markii la eegay awoodda xoolo dhaqatada, waxay dawladda kacaanku garatay in daawada iyo tallaalka xoolaha labadaba lacag la'aan laga dhigo.

Lacag badan ayey ku kaliftay dawladda siyaasadda ku saabsan xoojinta xooluhu. Miisaaniyadda ku baxday daawada iyo tallaalka ayaannu laba sanno idintusaynaa si aan u caddeynno ahmiyadda kacaanku saaray xoolaha.



| Sannadka | Shs. So. |
|---|---|
| 1970 | 273.354 |
| 1974 | 9.000.000 |

Lacagtaa kor ku qorani waxay ku baxday dhammaan daawada iyo tallaalka xoolaha, waxaana cad lacagta ku baxday labada sano ee kor ku qorani inay koredhay afartan jeer. Labada sano ee aan hoos ku sheegayno ayaa caddeynaya lacagta faraha badan ee ku baxday xooluhu waxay tartay:


| Sannadka | Daawada (Madax) | Tallaaalka (Madax) |
|---|---|---|
| 1969 | 2.028.342 | 1.110.283 |
| 1970 | 15.025.461 | 2.983.358 |

Cudurrada oo keliya oo lala dagaallamaa kuma filna daryeelidda Xoolaha, ee waxaa lagama maarmaan ah in la qaado tallaabooyin korhdinaaya wax soo saarka Xoolaha Nool.

Tallaabooyinka laga qaaday xagga kordhinta waxaa ka mid ah:

In la hagaajiyo daaqsinta iyo abuurka Xoolaha (Dhalan geddi). Taasi micnaheedu waxa weeye in Xoolaha salkooda sare loo qaado iyagoo lagu dhafayo noocyo kale oo ka fiican, waxaana la seereeyey dhul badan oo mashaariic ballaadhani ka socoto, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa ayaana faraha ku haysa mashaariicda noocaas oo kale ah.

Dadaalka jay Wasaaraddu u hayso daryeelka Xoolaha waddanka si lixaad leh ayaa loogu guulaystay.



# MACDANTA DALKA

Dalka Soomaaliyeed waa dal hodan ku ah xagga Macdanta. Waayahan danbe, siiba ka dib kacaanka curashadiisii, waxaa la ogaaday inuu dalkeennu awood weyn u leeyahay in laga helo khayraad badan oo macdaneed, taasoo salka ku haysa dhismaha Joolajiyada dalka. Fikraddaasi waxa sii xoojinaya macdanta faraha badan ee dalka lagu arkay.

Kacaanka ka hor ma jirin siyaasad cad oo saldhig u noqota baaridda Macdanta dalka. Shirkadihii ku lug lahaa baaridda Macdantu, waxay had iyo jeer dadaalkooda u jeedin jireen Macdanta dalkoodu u baahan yahay. Siyaasadda cusub ee kacaanka ee la xiriirta baaridda Macdantu waxay si gaar ah u tixgelinaysaa dhismaha Warshadaha dalka iyo sidii loogu heli lahaa alaabta ceyriin ee ay u baahan yihiin. Siyaasaddaasi heerkeedii u sarreeyey waxa lagu gaaray shirkii dadweynaha iyo shirkii aqoonyahannada Soomaaliyeed ee magaalada Xamar lagu qabtay dhammaadkii 1975kii.

Dalkeenna waxa laga helay Macdan kala gaddisan oo tiradeedu kor u dhafayso 30 macdanood, macdantaasi kuwa uguqaayaha weyni waa kuwa hoos ku qoran oo u kala qaybsan laba qaybood:

1) Kuwa haatanba la dhaqan gelin karo iyo

2) Macdanta wakhti yar oo baarid ah ka dib laga faa'iideysan karo.

**B. Macdanta dhismaha iyo warshadaynta (Building and Industrial Minerals or non-Metallic Minerals):**

b) Kuwa haatan la dhaqan gelin karo:
**Cement raw materials**

t) Didibka (gypsum) oo kayd weyn oo jaad sare ah lagana helo agagaarka Berbera.

Didibka waxaa loogu isticmaalaa:

— Samaynta sulphoric acid.
— Dhismaha (gypsum)
— Milix baabi'inta ciidda beeraha iyo samaynta Taba-ashiirta Dugsiyada.
— Sameynta dahaadhka kabidda ee meelaha ay dadku ka jabaan.

**J. Alaabta Dhismaha (Building raw Materials):**

Alaabta oo laba nooc kala ah:

— Alaab dhismo oo caadi ah sida limestone (mamac); clay Dhoobo, (gravel), quruurux (sandstone), dhagax cii-deed), quarzite iwm.
— Kuwa dhismaha qurxinta sida: Basalt, Gabbro, **Marble** Marmar), Jesomma sandstone, iwm.

**X.** Sepiolite: waxaa laga helaa agagaarka magaalada Ceel-Buur, waxaana loogu isticmaalaa:

— Sancada Kiimikada
— Sifaynta Batroolka iyo Sonkorta
— Baybka Sigaarka, birjikooyinka iyo alaabta Fanka.

2) Kuwa baarid yar ka dib dhaqan gali kara:

b) **Piezo-quartz** Macdantaas waxaa dhawaan laga helay dhul balaadhan oo ka mid ah G/Woqooyi Galbeed. Macdantaasi oo Istiraatijik ah, waxaa lagu isticmaalaa sancada casriga cusub.
t) **Feldespar** — Macdantaas waxaa si xoog leh loogu arkay bedda Lafaruug ee G/Wooqooyi Galbeed, waxaana lagu isticmaalaa:



— Ceramic Industry oo ah sancada waxyaabaha laga suubbiyo dhoobada.

Glass Industry oo ah sancada Galaaska, sida quraaradaha oo kale.

— Dhismaha.

**J. Kaolin (dhoobada saafiga ah)** waxaa macdantaas lagu arkay meelo ka mid ah Woqooyi Galbeed (Aw Barkhad-le) iyo (dhubato) iyo weliba koonfur (Buur-qalin, Mata-baan).

**X. Qaruuradaha (Glass sand)** — Alaabtaasi aad bay muhiim ugu tahay samaynta quraaradaha oo la socota baahideenna xagga horumarinta warshadaha quraaradaha. Waxaa laga helaa Gobolka Woqooyi Galbeed (Bandar Wanaag, Biyo-dhaadheer) iyo Xeebta Gobolka Banaadir iyo Sh. Hoose.

Kh. Waxaa kaloo xusid mudan in dalka xaggiisa Woqooyi lagu arkay macdanta (Asbeto) oo lagu isticmaalo warshadaynta tarniigga, lagana raja qabo in la helo kaydad waxtar ah oo macdantaasi ah.

**T. Macdanta Metaaligga ah (Metallic Minerals)**

**1. Kuwa la dhaqan gelin karo haatan:**

b. Yuraaniyamka Degmada Dh/Mareeb
t) Tiinka Majayahan

**2. Macdanta baarid yar ka dib dhaqan gal noqon karta:**

b. Birta Buur-Qalin
t. Titaniyuumka Kismaayo.

Waxaa hubanti ah inuu dalkeennu hodan ku yahay macdanta iyo alaabta ceydhiin taasoo waxtar weyn u yeelan doonta dhismaha dhaqaalaha waddanka.

intii kacaanka Hantiwadaagga ahi ka curtay dalka, si weyn ayaa laysugu taxaluujiyey baaritaanka macdanta, taasoo door weyn ay ka qaadanayaan aqoonyahannada Soomaaliyeed iyagoo ku dadaaley baaritaankaasi toddobadii sano ee kacaanku maamulaayey dalka.

Baaridda macdanta maaha amuur sahlan, waayo, waxay doonaysaa in marka hore la raad goobo shay-yaal ka mid ah macdanta, haddii la helana lagu sameeyo shaygii baaris dheer iyo dhuuxis . . . (analysis). Noocyo badan oo macdan ah ayey mar hore ka heleen dalkeenna aqoon yahanno Soomaaliyeed, hase yeeshee waxayna dhuuxin tirada,tayada, qiimaha, faca iyo waxtarka dhaw ee uu dalka u leeyahay.

Waxaa sahan lagu sameeyey Gobollada Bay iyo W/Galbeed, markii la dhammeeyeyna waxa la bilaabay shaybaar in lagu dhuuxo namuunadihii la soo ururinayey, si warbixin qumman looga qoro goobihii laga shaqeeyey. Shaqadii ahayd isugeynta macluumaadka iyo warbixinnada ee dabayaaqadii sannadkii 1975kii, waxay dhammaatay horraantii sannadkii 1976kii.

Shirku wuxuu ahaa kii 3aad ee la qabto intii joolajiyiinta Soomaaliyeed ay xilka macdan-baarista toos ahaan ula wareegeen, dulucdiisuna waxay ahayd: In qaybaha kala duwan ee Wasaaraddu soo jeediyaan fulistii hawshii 1976kii, si aqoon iyo waaya-aragnimo laysu waydaarsado.
In la baaro lagana doodo dhibaatooyinkii shaqadu la kulantay iyo sidii loo xallili lahaa.

In laysku dubbarido aqoolihii shaqada ee 1976ka. Waana lagu guulaystay.

Shirku wuxuu guda galay sahankii 1976kii isagoo tixgalinaaya go'aannadii shirweynihii 1aad ee Ummadda iyo talooyinkii aqoonyahannada Soomaaliyeed.

Waxa heshiisyo iskaashi lala galay waddammada xurmeeya isbahaysiga walaalnimo, waxaynuna tusaale u soo qaadanaynaa Mashruuca Majiyahan iyo Dalan oo lagu aasaasay 1972kii heshiis lala gaaray dawladda Bulgeeriya. Mashruucaasi Majiyahan oo wadajir ay u hirgelinayaan Dawladda Soomaaliya iyo Bulgaariya, wuxuu ka kooban yahay baarid iyo soo saarid.



# BEERAHA

Beeruhu waa tiirka weyn ee dhaqaalaha waddanku ku tiirsan yahay, hase yeeshee waqtigan aan joogno xoolaha ayaa cayaara doorka koowaad ee dhaqaalaha, ha ahaato cuntada waddanka amase lacagta adag ee aan dibadda ka helno. Inkastoo arrintu sidaa tahay haddana rajada ugu weyn ee dhaqaale kordhisiinta waddanka, beeraha ayey ku jirtaa. Iyadoo taa la tixgalinaayo ayaa qorshaha shanta sano ee 1974 - 1978 loo siiyey beeraha heerka koowaad.
Waddanka Soomaaliyeed balliciisu wuxuu dhan yahay 63.765.000 oo hektaar oo u kala qaybsama sida hoos ku qoran :

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Dhulka la beerikaro | (Hektaar) | 8.150.000 (13%) |
| 2. | Dhulka Daaqsiin ah | | 28.850.000 (45%) |
| 3. | Dhulka lama degaan | | 26.765.000 (42%) |
| | | | 63.765.000 (100%) |

Sida looxa kor ku qorani muujinayo waddanka waxaa loo isticmaali karaa in xoolana lagu dhaqo, beerana laga beero. Inkastoo tillaabooin lixaad leh laga qaaday sidii tacab soo saarka beeraha loo kordhin lahaa, laakiin guulihii la soo hooyey ma gaarin intii la doonayey, sababtoo ah dhibaatooyin farsamo iyo cilmiedeed oo ka hor yimid. Waxa la yaab leh in la beeri karo dhul baaxaddiisu tahay 8.150.000 oo hektaar, kuna habboon biyo roob iyo biyo waraabin labadaba, in haddana waddanku dibadda ka soo gato cuntada waddanka ka bixi karta oo isla markaana wa xoogaagi lacagta adag ee aan ka helnay xoolihii la dhoofiyey aan ku isticmaallo arrintaa iyada ah.

Dhulka ballaaran ee beermi kara oo si habsami ah loo beero ayadoo la tixgelinayo nafaqada, ayaan kaga bixi karnaa dhibaatada wax soo saarid-yarida, aanan ku dheellitiri karaa faraqa u dhexeeya wax soo saarka iyo wax cunidda. Haddii la saaro ahmiyadda wax soo saarka, beeraha u qalma, waxa hubaal ah in waddanku iskaga fillaan karo xagga cuntada, dheellitiri doonto ganacsiga dibadda. Hadda waddanka inta la beeri karo waxa lagu qiyaasay inay tahay 9%. Dhulka hadda beeranina wuxuu dhan yahay 700.000 oo Hektaar, oo 200.000 ay tahay biyo waraab.

Sidaa looxa ku cad, dhulka la beero aad buu u yaryahay, inkasta oo aan la billaabanay tan iyo sannadkii 1969kii sababtoo ah dadaal xoog leh oo lagu qaaday tacab soo saarka beeraha si looga hortago baahida loo qabo cuntada waddanka gudihiisa iyo si loo badbaadsho lacagta adag ee ku baxda cuntada. Inkastoo wax soo saarka beeruhu. aad kor ugu kacay. haddana dadka oo dhaqaalihiisu kor u kacay awgeed ayaa cuntada dibadda laga keeno ay iyaduna kor ugu kacday.

Dhaqaalaha dadka ee kor u kacay, waxaa ugu wacnaa mashaariicda horumarinta dhaqaalaha oo aad u fara badnaa dad badan oo shaqo la'aani haysatayna ay shaqo ka heleen. Dhibaatada ka taagan xagga beeraha kuma koobna dhulka beeran oo aad u yar, waxaa ka daran heerka wax soo saarka oo aad u hooseeya (3-10 kiintaal ayaa ka soo baxa Hektarkiiba) Sidaa awgeed haddii la rabo in si buuxda wax looga qabto wax soo saar xumada, waa in si lixaad leh kor loogu qaadaa heerka wax-soo-saarka. Si wax looga qabto arrintaa iyada ah laba arimood ayaa guddoonsaday :

1. In la xoojiyo machadka tijaabada beeraha si loo helo abuur caafimaad qaba iyo in la helo habsan oo lagula dagaallamo cayayaanka beeraha.
2. In kor loo qaado nafaqada ciidda, isla markaana la joojiyo ciidda maydhanta (Soil Erosin).

Qorshihii dawladda ee hirgalay sannadkii 1971 - 73kii afar iyo soddon mashruuc oo beeraha ku saabsan ayaa hirgalay, labaatan iyo saddexna qorshaha sannadka 1973 - 75ka ayaa lagu fuliyey.
Qorshaha ballaaran ee shanta sano ah 1974 - 78ka mashaariic kale oo fara badan ayaa lagu tala jiraa in la hirgaliyo. Ahmiyad gaar ah ayaa la saaray beeraha, waxaana taa caddeynaysa miisaaniyaddii ugu badnayd oo la siiyey beeraha qorshaha shanta sano, waxaana loola dan leeyahay in isku fillaan xagga cuntada laga gaaro sannadka 1980ka.
Guulo waaweyn ayaa la gaaray tan iyo intii uu kacaanka barakaysani uu maamulka waddanka hayey. Waxyaalaha ugu waaweyn ee la beero waxaa ka mid ah badarka, galleyda, mooska, midhaha sallidda.





Lagu daabacay :

Wakaaladda Madbacadda Qaranka
MUQDISHU

JUUNYO 1977

